

# QORAAL KOOBAN OO KUSAABSAN COVIDED – KOOFIDH-19 IYO WAXBARASHADA SOOMAALIYA/ SOMALILAND

**Jaamacadda Bristol, Transparency Solutions iyo wax-ka-beddelka Waxbarashada si loo helo mustaqbal raandhiis leh/waara**

## TUSMADA

NUXURKA

Hordhac

Liiska Shaxaha

Helitaanka waxbarashada

Tayada waxbarashada

Waayo-aragnimada shakhsiga ah ee waxbarashada Soomaaliya/Somalialnd

Saamaynta Koofidh-19 iyo ka falcelintiisu ku yeelatay waxbarashada

ka-falcelinta waxbarasho ee Koofidh-19

Saamaynta waxbarashada kooxaha danyarta ah

Falcelinta ka timid natiijooyinka hordhaca ah

Falanqayn

Natiijooyinka Muhiimka ah

## Nuxurka

Soomaaliya iyo Somaliland si daran ayaa Koofidh-19 u saameeyay, si gaar ah sababta oo ah maqnaanshaha kaabayaasha iyo adeegyada daryeelka caafimaad; nololo tiro badan ayaa dhaawac gaadhay oo la waayay, taas oo ay garab socoto dhaawac gaadhay dhaqaalaha, nolosha dadka iyo waxbarashadooda.

Intii lagu gudo-jiray barnaamijkan, waxa aannu u kuurogallay sida Koofidh-19 iyo falcelinta laga bixiyay ay sida ay saamaynta gaarka ah ugu yeesheen waxbarashada dadka iyo waaxda waxbarashada guud ahaan. Waxa aannu dhiirigelinnay in loo dhammaado barnaamijka iyo ka-qaybgal annaga oo la xiriirnay dadyow aan codkooda la maqal oo ay kamid yihiin xoolo-dhaqatada reer miyiga ah, dadka deggen miyiga iyo dumar. Si aannu u helno fahan dheellitiran, waxa aannu hawgelinay ka-qaybgalayaal masuul ka ah dhinacyo kala duwan oo waxbarashada ah oo u dhaxeeya dugsi hoose iyo sare ilaa Tacliinta

Sare iyo Waxbarashada Tabobarka Farsamada iyo Xirfadaha (TVET), oo ay ku jiraan dad wax dhiga iyo masuuliyiin dawladeed.

Ka-qaybgalayaashu waxa ay muujiyeen dareen bilow ah oo togan oo ku aaddan helitaanka iyo tayada waxbarashada. Haseyeeshee, falanqayn dheeraad ah kadib waxaa caddaatay in dareenkaas togani uu yahay mid la xiriira isbarbardhigga waxbarashada carruurta ee imminka iyo waxbarashadii dadka ee 1990-nadii iyo 2000-nadii markii colaaduhu ay muuqdeen. Sida oo kale waxaa la tilmaamay in dareenkii tognaa ee bilowga ahaa uu ku salaysan yahay xaaladda dal soo kobcaya. Waxaa jira sii-wanaajinno badan oo ay tahay in la sameeyo oo ay kamid yihiin hirgelinta nidaaminta waaxda waxbarashada si loo hubiyo xaqiijinta bar-bilowyada tayada, iyo in aan dugsiyadu lacag badan ka qaadin ardayda. Bulshooyinka reer miyiga ah waa la dayacaa marka la eego dhanka waxbarashada, iyada oo had iyo jeer ayna lahaynba dugsiyo u adeegga. Ka-qaybgalayaasha Muqdisho iyo Hargeysa labaduba waxa ay sheegeen in baahida Barashada Farsamada iyo Xirfaduhu (TVET) ay aad uga ballaaran tahay inta la daboolo haddeer.

Ka-falcelinta dowladda ee Koofidh-19, gaar ah xidhitaanka dugsiyadu, waxa ay dhaawacday waxbarashada ardayda iyo horumarkoodii, iyo sida oo kale dakhligii hay'adaha waxbarashada iyo maciishaddii shaqaalihii dakhliga yaraa ee ku tiirsanaa shaqooyinkooda waaxda waxbarashada iyada oo dugsiyada qaar ay ka baqayaan inayna maaliyad ahaan samatabixi doonin.

Carruurta iyo gaar ahaan habluhu si dheeraad ah ayay ugu nuglaadeen rabshad iyo ka-faa'idaysi inta ayna aadaynin dugsiyada, iyada oo dowladuhu falcelintooda Koofidh-19 ayna tixgelin siinin kooxahaas nugul oo ay kamid yihiin bulshooyinka reer miyiga ah iyo shaqaalaha dakhligoodu hooseeyo.

Iyada oo xiritaanka dugsiyada lagu dhowray/badbaadiyay nolosha dadka, qaar kamid ah ka-qaybgalayaasha ayaa dareemay in falcelintu ay guud ahaan dhalisay dhibaato ka ballaaran intii la aqbali karaayay, gaar ahaan iyada oo da' yartu ay isugu imanayeen goobaha dadweeynuhu ku kulmo iyada oo dugsiyadii la xiray, taas oo suurtogal ah inay gacan ka geysato faafidda Koofidh-19.

Ka-qaybgalayaashu waxa ay aaminsan yihiin in si laf-jab ah ay dhacdooyinkaasi u saameeyeen kooxaha danyarta ah (laga fursadaha badan yahay), loona baahan yahay in awoodda la saaro qaabab kale oo waxbarasho si loo dhiirigeliyo adeegsiga xirfadaha lataabankaro taas oo iyana taageeri doonta shaqo abuurka. Habraacani waxa uu si wacan u la jaanqadi doonaa mowduuca horumarka waara iyo in dib wax loogu dhiso si ka fiican qaabkii hore, iyada oo la hubinayo in dadyowga nuguli ay mustaqbalka u babac dhigi karaan xaaladaha degdegga ah ee Koofidh-19 oo kale.

## HORDHAC

COVIDED ujeedadiisu waa in la fahmo, islamarkaana lasii wanaajiyo saamaynta ka-falcelinta Koofidh-19 ku leedahay waxbarashada Soomaaliya iyo gobolka ka go'ay ee Somaliland, iyada oo ka-qaybgalayaasha laxushay la marinay saddex wareeg oo waraysiyo ah, oo natiijada ka soo baxday lagu soo gudbiyay warbixintan.

Transparency Solutions (TS) ayaa doortay oo hawlgelisay ka-qaybgalayaasha iyada oo la adeegsanayo habraaca Wakiilka La-garanayo (sida Sumcaddeeda ah xiriiriye lagu kalsoon yahay). Ka-qaybgalayaasha 40ka ahi waa rag iyo dumar waaweyn oo deggen deegaanka Muqdisho ee Soomaaliya iyo deegaanka Hargeysa ee Somaliland. Waxa aanu gaadhnay dadka loogu faquuq badan yahay annaga oo hubinayna ka-qaybgal buuxa iyada oo la adeegsanayo moobil yar oo kuwa casriga ah. Ku dhawaad 50% dadka waaweyn ee Soomaaliya/Somaliland waxa ay ugu yaraan leeyihiin moobil fudud (casri ahayn); moobiladdani waxaa xitaa caadi u isticmaala dadka dakhligoodu aadka u hooseeyo. Adeegga isaga bixi-sida aad -marba u isticmaashid waa hab aad u jaban, shabakidda iskuxiritaankuna waa mid aad u fiican, lacag-bixinta ugu badanna waxaa lagu sameeyay farriin qoraal ah iyada oo la adeegsanayo moobil fudud (aan casri ahayn) oo ma aha lacag caddaa ah (kaash). Marka ay jiraan waxyaabo qoraal ahi, dadka aan wax qorin wax na akhriyin iyo dadka waxbarashadoodu kooban tahay waa in loo akhiriyaa ama nuxurka qormada taleefan loogu sheegaa. Cilmi-baadhayaashu waxay ka-qaybgalayaasha ku la hadleen af kasta oo u fudud, oo ay kamid ahaayeen lahjadda Maay ee Soomaaliga iyo afka Carabiga. Si joogto ah ayaa aannu farsamooyinkaas u adeegsannaa si aanu kooxaha loogu faquuqa badan yahay awood ugu siinno inay ka-qaybqaataan barnaamijyadayada. Boqollaal waraysi ayaannu ka qaadnay kooxaha loogu faquuqa badan yahay, marna ma ay dhicin in qof kamid ahi iskaga baxo barnaamijka.

Ujeedkayagu ma ahayn muunad ka wada turjunta bulshada, taas oo ah mid ka turjunta saamilayda kooxaha kala duwan ee bulshada, balse waxa aannu beegsanaynay in aannu helno qiyaasta ugu dhow ee macquul ah. Bulshada Soomaaliya/Somaliland marka la soo dhaweeyo 50% waa reer magaal, 25% reer miyi iyo 25% reer guuraa ah. Ku dhowaad kala bar bulshadu weligood ma ay helin waxbarasho rasmi ah. Dadka aan waxna qorin waxna akhriyin waxa ay ku dhowdahay 90% xoolo-dhaqatada reer guuraaga ah, 70% bulshooyinka reer miyiga ah iyo dadka ku barakacay gudaha dalka (IDPs) iyo 35% reer magaalka aan barakacayaasha ahayn. Hadafkayaga ugu weeyni waxa uu ahaa dadka deggan magaalooyinka iyo weli ba reer miyiga iyo reer guuraaga, iyo dadka aan helin waxbarasho rasmi ah oo badan.

Goob kasta waxa aannu ka qaadannay shan qof oo ka shaqeeya waxbarashada iyo shan masuul waxbarasho oo dowladeed; meel kasta qof ayaa ka socday dugsiyada hoose, sare, Waxbarashada Aan Rasmiga ahayn (ABE/NFE), Waxbarashada iyo Tabobarka Farsamada iyo Xirfadaha (TVET) iyo Tacliinta Sare. Intaas ka dib waxa aannu qaadannay ka-qaybgalayaal waxbarashadoodu tahay sidan: aan weligood qaadan waxbarasho rasmi ah, waxoogaa/dhammeeyay dugsi hoose, waxooga/dhammeeyay dugsi sare, waxooga/dhammeeyay ABE/NFE, waxoogaa/dhammeeyay TVET iyo waxoogaa/dhammeeyay tacliin sare. Reer miyiga iyo xoolo-dhaqatada reer guuraaga ah waxa aannu ka qaadannay dad aan qaadan waxbarasho rasmi ah iyo kuwo qaatay waxoogaa ama dhammeeyay dugsi hoose.

Ka-qaybgale kasta waxaa la siiyay $25 waraysi kasta si loo dhiirigeliyo in wax lagu celiyo Soomaaliya iyo Somaliiland iyada oo isla markaasna la hubinayo in la ka-qaybgale kasta loo cawilo wakhtigiisa qaaliga ah.

Wejiga koowaad ee barnaamijka COVIDED ee qoraalkan wargelinta ahi ku saabsan yahay waxa uu daaha ka feyday sinnaanshiyo la'aan cad oo u dhaxaysa bulshooyinka reer miyiga ah iyo kuwa magaalooyinka, galdaloollo waaweyn oo ka jira nidaamyada waxbarashada ee Soomaaliya iyo Somaliland iyo nuglaanshiiyo si toos ah uga dhashay qaar kamid ah tallaabooyinka ka-falcelinta Koofidh-19; taas oo tilmaamaya dhinacyada ay tahay in wax laga qabto iyada oo la waafajinayo mabada' in Koofidh-19 kadib, wax loo dhiso qaabkii hore si ka fiican.

## LIISKA SHAXAHA

**Shaxda 1aad – Helitaanka waxbarashada – Muqdisho**

**Shaxda 2aad – Helitaanka waxbarashada – Hargeysa**

**Shaxda 3aad – Tayada Waxbarashada – Muqdisho**

**Shaxda 4aad – Tayada Waxbarashada – Hargeysa**

**Shaxda 5aad – Saamaynta Koofidh-19 iyo ka falcelintiisu ku yeelatay waxbarashada – Muqdisho**

**Shaxda 6aad – Saamaynta Koofidh-19 iyo ka falcelintiisu ku yeelatay waxbarashada– Hargeysa**

**Shaxda 7aad – Ka-falcelinta Koofidh-19 ee waxbarashada – Muqdisho**

**Shaxda 8aad – Ka-falcelinta Koofidh-19 ee waxbarashada – Hargeya**

**Shaxda 9aad – Falcelinta ka timid natiijooyinka hordhaca ah – Muqdisho**

**Shaxda 10aad – Falcelinta ka timid natiijooyinka hordhaca ah – Hargeysa**

### *HELITAANKA WAXBARASHADA*

*Ka-qaybgalayaasha waxa aannu weydiinnay, 'Kuwan soo socda kee baa ugu dhoow aragtidaada ku saabsan guud ahaan helitaanka waxbarashada ee Soomaaliya/Somaliland?'*

***Shaxda 1aad: Helitaanka waxbarashada – Muqdisho***

| Kuwan soo socda kee baa ugu dhow aragtidaada ku saabsan guud ahaan helitaanka waxbarashada ee Soomaaliya/Somaliland? | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| Aad u fiican | Iska fiican | Ma na fiicna ma na xuma | Waxoogaa liita | Aad u liita | Ma garanayo/ Jawaab la'aan |
| *5* | *11* | *2* | *1* | *1* | *0* |

**Shaxda 2aad: Helitaanka waxbarashada – Hargeysa**

| Kuwan soo socda kee baa ugu dhow aragtidaada ku saabsan guud ahaan helitaanka waxbarashada ee Soomaaliya/Somaliland? | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| Aad u fiican | Iska fiican | Ma na fiicna ma na xuma | Waxoogaa liita | Aad u liita | Ma garanayo/ Jawaab la'aan |
| 8 | 7 | 2 | 3 | 0 | 0 |

*85% ka-qaybgalayaasha Muqdisho si togan ayay uga warrameen helitaanka waxbarashada, iyada oo 55% ay sheegeen in ay 'iska fiican tahay'. Laba ka-qaybgale ayaa yidhi 'Ma na fiicana, ma na liidato', hal ka-qaybgalana helitaanka waxbarashada ee Muqdisho waxa uu ku tilmaamay mid 'Aad u liidata'.*

*Ka-qaybgalayaasha Muqdisho guud ahaan waxa ay isla ogol yihiin in dugsiyadu ay ka jiraan dalka oo dhan. Haseyeeshee, in dugsiyadaas intooda badani ay yihiin kuwo gaar loo leeyahay oo u baahan in lacag laga bixiyo si loo dhigto. Ka-qaybgale deggan miyiga ayaa sida oo kale tilmaamay in laga yaabo bulshooyinku in ayna ogeyn ama kawar haynin jiritaanka dugsiyada.*

> *Meel kasta oo kamid ah dalka waa laga helaa dugsiyada, gaar ahaan kuwa gaarka loo leeyahay. Qof kasta oo heli kara lacag sidoo kale waxa uu heli karaa waxbarasho. Balse waxaa yar dugsiyada guud (dowladda). (KQ20 –Xoolo dhaqato helay waxoogaa/dhammeeyay dugsi hoose)*

> *Soomaaliya waa laga helaa waxbarasho, balse caqabado ayaa ka jira dhinacyada lacagta iyo wacyiga dadka oo helitaanka waxbarashada hoos u dhiga. (KQ17 – Qof reer miyi ah oo aan helin waxbarasho rasmi ah)*

> *Waa ay iska fiican tahay; waxbarashada aad ayaa looga helaa Soomaaliya. Gobol kasta iyo tuulo kastaa waxa ay leeyihiin hay'adahooda waxbarasho ee heerarka kala duwan. (KQ9 – Ka shaqeeya Waxbarashada iyo Tabobarka Farsamada iyo XIrfadaha)*

*Kharashka badan ee helitaanka waxbarashada loogu baahan yahay ayaa ay xuseen ka-qaybgalayaal kaladuwan, oo ay ku jiraan masuul waxbarasho oo dowladeed iyo qof ku nool deegaan miyi ah, iyada oo jawaabuhu ay tilmaamayaan sida dugsiyadu qaaliga u yihiin iyo sida ayna dad badan suurtogal ugu ahayn inay is qoraan iyo inay dhigtaan.*

> *Waa la heli karaa, balse lama jari/awoodi karo. Helitaanka dugsiyadu waa uu hooseeyaa, in kasta oo dugsiyadu ka jiraan meel kasta, balse lama jari/awoodi karo. Ku dhawaad 15% carruurta da'da dugsiga ee Soomaaliya ayaan aaddin dugsiyo. (KQ5 – Masuul waxbarasho oo dowladeed oo masuul ah Tacliinta Sare)*

> *Helitaanka waxbarashadu aad ayuu u hooseeyaa Soomaaliya. Carruurta da'da waxbarashada gaadhay tiro aad u yar ayaa aadda dugsiyada; taasi waxa ay ku tusinaysaa in jiritaanka iyo helitaanka dugsiyadu ay aad ugu hooseeyaan Soomaaliya. (KQ10 – qof ka shaqeeya Tacliinta Sare)*

*In kasta oo guud ahaan ay togan tahay jawaabta ka-qaybgalayaasha Muqdisho ee ku aaddan helitaanka waxbarashada, haddana waxa ay daaha ka faydeen galdaloollo ka jira waaxda iyaga oo sheegay in aan waxbarashada laga helin deegaannada miyiga ah iyo in aan mudnaan la siinin waxbarashada farsamada iyo xirfadaha.*

> *Cid kastaa ma heli karto waxbarasho. Sidoo kale, shaqo la'aantu waa ay hoosaysaa iyada oo isla markaasna waxbarasho iska xaddidan tahay. Sidoo kale waxbarashada gaarka ahi waa qaali. Waxbarasho kama jirto deegaannada miyiga ah. (KQ16 – Qof deggan magaalo oo helay waxoogaa/dhammeeyay Tacliin Sare)*

> *Waxbarashada aad ayaa looga helaa Soomaaliya. Balse dugsiyada tacliinta gaarka ah, waxbarashada farsamada iyo xirfadaha kale ayaa weli maqan. (KQ8 – Qof ka shaqeeya Waxbarashada Aasaasiga ah ee Bedelka ah/ Waxbarashada Dadban (ABE/NFE)*

*75% ka-qaybgalayaasha Hargeysa waxa ay helitaanka waxbarashada ku qiimeeyeen ama mid 'Aad u fiican' ama mid 'Iska fiican', iyada oo tiro lamid ah tii Muqdisho ay ku qiimeeyeen mid 'Aan fiicnayn, aan xumayn na'. Saddex ka-qaybgale ayaa sheegay in helitaanka waxbarashadu in uu 'Waxoogaa liito', oo saddex jeer ka badan inta Muqdisho ee jawaabtaas oo kale bixisay.*

*Ka-qaybgalayaasha Hargeysa waxaa ku badnaa inay hadalkooda ku bilaabaan in ay ku nool yihiin qaran koraaya oo horumaraya, iyada oo isla markaasna laga soo kabanayo riiqdii dagaal sokeeye, sidaas darteedna xaaladda helitaanka waxbarashadu in ay fiican tahay.*

> *Waxa aaannu leenahay dugsiyo iyo jaamacado si wanaagsan u shaqeeya. Ardaydu waa suurtogal in ay helaan waxbarasho. (KQ40 – Xool-dhaqato reer miyi ah oo leh waxooga/dhammeeyay waxbarasho dugsi hoose).*

> *Waxa aan odhan karaa waa heer dhexdhexaad ah maadaama aannu nahay dal koraya oo soo kabanaya. (KQ34 – Qof deggan magaalo oo leh waxoogaa/dhammeeyay waxbarashada ABE/NFE)*

> *Toban kii sano ee ugu danbeeyay, waxabarashada dalkayagu waa ay isa soo taraysay oo horumaraysay. Waxaa sii kordhay fursadihii, balse weli caqabado waxa ay naga haystaan helitaanka waxbarashada ee qoysaska saboolka ah. (KQ35 - Qof deggan magaalo oo leh waxoogaa/dhameeyay waxbarasho TVET)*

> *Waxbarashada dalkayagu aad ayay u fiican tahay sababta oo ah waa ay horumaraysay oo isa soo taraysay laga soo bilaabo 1991kii markii aannu la soo noqonnay madaxbannaanidayada. Soddon sano ayay ku dhowdahay muddadaas waxbarashadu kobcasay. Horumarrada ugu fiican ee dalku sameeyay weeyaan. Ma lihi wax kastaa waa saxan yahay 100%, balse waxa aannu leennahay waxbarasho kobcaysa oo sii wanaagsanaanaysa marba marka ka danbaysa. (KQ25 - Masuul waxbarasho oo dowladeed oo ka masuul ah Tacliinta Sare)*

Haseyeeshee, ka-qaybgale ku sugan Hargeysa oo masuul ka ah Waxbarashada iyo Tabobarka Farsamada iyo Xirfadaha (TVET) ayaa sheegay in helitaanka dugsiyada farsamadu uu aad u hooseeyso, taas oo ka dhigaysa helitaanka waxbarashada dadban mid ka hoosaysa ta rasmiga ah.

> *Haddii aynu ka hadalno nidaamkayaga waxbarasho, waaxda waxbarashada tooska ah iyo waaxda waxbarashada dadban, helitaanka waxbarashada tooska/rasmiga ahi waa mid ay u fududahay in dadka oo dhami ay helaan, in kasta oo ay tayadu liidato. Balse helitaanka waxbarashada dadban ayaa aad u hooseeya sababta oo ah dugsiyada farsamada ayaa aad ugu yar dalkayaga. (KQ29 - Qof ka shaqeeya Waxbarashada iyo Tabobarka Farsamada iyo Xirfadaha (TVET)*

Si lamid ah ka-qaybgalayaasha Muqdisho ayaa ka-qaybgalayaasha Hargeysa ay sheegeen in aan waxbarashada laga heli karin meel kasta, iyada oo aagagga magaalooyinka ahi ay ka helitaan og yihiin

waxbarashada marka la barbardhigo deegaannada miyiga ah. Awoodda dhaqaale ayaa iyana la sheegay inay caqabad ku tahay helitaanka waxbarashada ee Hargeysa.

> *Waxbarashadu ma gaadhsiisna dhammaan degmooyinka iyo gobollada dalka. (KQ - Qof deggan magaalo oo helay waxoogaa/dhammeeyay Tacliin Sare)*

> *Dadka kunool magaalooyinka waxaa u suurtogal ah in ay carruurtooda qoraan dugsiyo, ha noqdaan kuwo gaar ah ama kuwo dowladeed. Taas waxaa ka duwan dadka kunool deegaannada miyiga ah ama reer guuraaga oo aan galaangalkaas oo kale lahayn. Sidaas darteed, helitaanka waxbarashadu waa iska fiican tahay. (KQ27 - Qof ka shaqeeya waxbarashada dugsiga sare)*

> *Waa ay ku adagtahay qoysaska dakhligoodu hooseeyaa in ay carruurtooda ku daraan dugsiyada sababta oo ah xaaladdooda dhaqaale ayaan usaamaxayn. (KQ33 - Qof deggan magaalo oo helay waxoogaa/dhammeeyay dugsi sare)*

> *Waxa aan odhan karaa fursadaha waxbarasho ee dalku aad ayay u fiican yihiin, balse mushkiladdu waa dhanka haynta/dhaqaalaha. Waxbarasho fiican ayaa aynu leennahay; waxa aynu arki karnaa waxsoosaarka sanadlaha ah. Waxa aan dhiirigelin lahaa in sare loo qaado oo la sii wanaajiyo xaddiga is-qorista sannadlaha ah. (KQ22- Masuul waxbarasho oo dowladeed oo masuul ka ah dugsiyada sare)*

## TAYADA WAXBARASHADA

Waxa aannu ka-qaybgalayaasha weydiinnay, 'Kuwan soo socda kee baa ugu dhow in uu ka turjumo aragtidaada ku aaddan tayada waxbarashada Soomaaliya/Somaliland?'

**Shaxda 3aad: Tayada Waxbarashada – Muqdisho**

| Kuwan soo socda kee baa ugu dhow in uu ka turjumo aragtidaada ku aaddan tayada waxbarashada Soomaaliya/Somaliland? | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| Aad u fiican | Iska fiican | Ma na fiicna ma na xuma | Waxoogaa liita | Aad u liita | Ma garanayo/ Jawaab la'aan |
| 2 | 7 | 5 | 5 | 1 | 0 |

**Shaxda 4aad: Tayada Waxbarashada – Hargeysa**

| Kuwan soo socda kee baa ugu dhow in uu ka turjumo aragtidaada ku aaddan tayada waxbarashada Soomaaliya/Somaliland? | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| Aad u fiican | Iska fiican | Ma na fiicna ma na xuma | Waxoogaa liita | Aad u liita | Ma garanayo/ Jawaab la'aan |
| 2 | 13 | 2 | 3 | 0 | 0 |

25% ka-qaybgalayaasha Muqdisho tayada waxbarashada waxa ay ku qiimeeyeen mid 'Waxoogaa liidata' iyada oo saami lamid ahi tayada waxbarashada ku tilmaameen 'Ma na fiicna, ma na xuma', halka ka-qaybgale keli ahi ku tilmaamay mid 'Aad u liidata'. 45% ka-qaybgalayaasha Muqdisho waxa ay tayada waxbarashada ku tilmaameen mid 'Iska fiican', ama mid "Aad u fiican'.

Ka-qaybgalayaasha leh waxoogaa waayo-aragnimo shakhsi ah oo la xidhiidha waxbarashadu, arday iyo barayaal ahaan labadaba, waxa ay sheegeen in manhajku haatan midaysan yahay dalka oo dhan, taas oo faa'ido u leh tayada waxbarashada. Bare dugsi sare iyo xoolo-dhaqde reer miyi ah ayaa taas u aaneeyay Wasaaradda Waxbarashada ee Federaalka.

> *Ta ugu weeyni waa in barayaashu ay aqoon fiican leeyihiin. Wasaaradda Waxabarashadu sidoo kale shaqadeeda ayay si qurux badan uga soo baxaysaa. Waxaa jira manhaj keli ah oo dalka oo dhami ku midaysan yahay. (K20 - Xoolo-dhaqato reer miyi ah oo helay waxooogaa/dhammeeyay waxbarasho dugsi hoose)*

> *Manhajkayagu imminka sidii hore waa uu ka fiican yahay. Dugsiyada iyo meel kasta waxaa jooga barayaal badan. (KQ13 - Qof deggan magaalo oo helay waxoogaa/dhammeeyay waxbarasho dugsi sare)*

> *Wasaaradda waxbarashadu shaqadeedi ayay qabsanaysaa. Waxaa jira barayaal carbisan oo ka howlgala waaxda waxbarashada kuwaas oo wax ka tara tayada waxbarashada. Haatan, waxa aannu leennahay manhaj midaysan oo ka howlgala dalka oo dhan. Balse horumar badan oo la samayn karo ayaa jira. (KQ7 - Qof ka shaqeeya waxbarashada dugsiga sare)*

Qof deggan magaalada Muqdisho ayaa sheegay in tayada waxbarashadu ay fiican tahay sababta oo ah dad badan ayaa ka qalinjabiya oo awood u yeesha in ay haystaan shaqooyin ay sabab u tahay waxbarashadu.

*Waxa aan aaminsanahay in ay fiican tahay tayada waxbarashada Soomaaliya sababta oo ah dadka wax ka barta ee ka qalinjabiya dugsiyadu waa ay wanaagsanaadaan oo shaqooyin wanaagsan ayay haystaan. (KQ11 - Qof deggan magaalo oo aan weligii helin waxbarasho rasmi ah)*

Haseyeeshee, ugu yaraan afar ka-qaybgale oo ku sugan Muqdisho ayaa walaac ka muujiyay jaan-gooyn la'aanta ka jirta waaxda waxbarashada, iyaga oo sheegay in ay taasi si taban u saamayso tayada sababta oo ah waxa aan jirin nidaamin taas oo u baahan in wax laga qabto. Isla-xisaabtan la'aanta ayaa sidoo kale loo aaneeyaa badnaanta dugsiyada gaarka loo leeyahay ee macaash-doonka ah ee aan mudnaanta koowaad siinin tayada.

*Tirada dugsiyada iyo jaamacadaha Soomaaliya aad ayay u badan yihiin. Ma jiro nidaam habeeyaa. Taasi waxa ay hoos u dhigaysaa guud ahaan tayada waxbarashada Soomaaliya. (KQ19 - Xoolodhaqde reer miyi ah oo aan weligii helin waxbarsho rasmi ah)*

*Dalkeennu ma laha nidaamyada waxbarashada iyo halbeegyada hubinaya tayada tacliinta. Intaas waxaa dheer, inta badan xarumaha waxbarashadu waxay u furan yihiin ganacsi taas oo hoos u dhigaysa tayada. (KQ16- Qof deggan magaalo oo helay waxoogaa/dhammeeyay Tacliin Sare)*

*Dadka ka shaqeeya tacliintu ma laha waayo-aragnimo. Aad wax uma ay baran. Waxaa ka maqan xirfadaha iyo karaanka inay kashaqeeyaan tacliinta. Tayo-dhowrku isna meesha waa ka maqan yahay. Manhajka nidaamkeenna waxbarasho isna waa liitaa, in kasta oo uu ka wanaagsan yahay sidii hore. (KQ 6 - Qof ka shaqeeya waxbarashada dugsiga hoose)*

Ka-qaybgalaha ka shaqeeya TVET ee Muqdisho isaga oo cabbiraya isla dareenka ka Hargeysa ee la xidhiidha helitaanka TVET, waxa uu sheegay in tayada TVET ay haatan hoosayso; gaar ahaan marka la barbardhigo dalalka kale ee gobolweeynaha Geeska Afrika.

*Haatan waxa aan ka shaqeeyaa dugsi TVET, marka la barbardhigo dalalka deriska, aad ayaannu uga danbaynna dhanka tayada. Horumar badan oo ay tahay in la sameeyo ayaa jira. Xataa waxbarashada rasmiga/tooska ah ayaa tayadeedu waxooga liidataa. (KQ9 - Qof ka shaqeeya Waxbarashada iyo Tabobarka Farsamada iyo Xirdadda)*

Ka-qaybgalayaasha Hargeysa waxa ay muujiyeen dareen ka togan ka dhiggooda Muqdisho dhanka tayada waxbarashada, iyada oo 75% ka-qaybgalayaashu ay ku jawaabeen 'Aad u fiican' ama 'Iska fiican', iyada oo hal ka-qaybgale na aanu dooran 'Aad u liita'. Haseyeeshee, 25% ka-qaybgalayaasha Hargeyssa ayaa ku jawaabay 'Ma na fiican ma na xuma' maa 'waxoogaa liita', halka faahfaahinta dheeraadka ah ee ay bixiyeen tilmaamtay tabnaan dheeraad ah oo taas taageeraysa.

Qodob muhiim ah oo loogu dooday in tayada waxbarashada ee Hargeysi ay fiican tahay waa isla dooddii loo cuskaday helitaanka waxbarashada; taas oo ah in waaxda waxbarashadu ay ku shaqaynayso duruuf adag iyo in tayadu ay si isa soo taraysa u sii fiicnaanayso xaaladda marka la eego.

*Waxaa jira dedaal ay waddo Wasaaraddu oo lagu sii wanaajinayo tayada waxbarashada, iyada oo la dhowrayo barnaamijyada tabobarka barayaasha. Haa, weli waxaa jirta baahi loo qabi in si nidaamsan loo tabobaro barayaasha, waxa aannu nahay dal sii kobcinayay nidaamkiisa waxbarasho ee heerarka kala duwan oo dhan; heer qaran, gobol iyo degmo. Taasi waxay wax ka taraysaa jaangoynta nidaamka waxbarasha oo dhammaystiran oo weli ka socoto dalka. (KQ23 - Masuul waxbarasho oo dowladeed oo masuul ka ah Waxbarashada Aasaasiga ah ee Bedelka ah/ Waxbarashada dadban (ABE/NFE))*

Barbilowga waxbarasho tayadeedu wanaagsan tahay ee ka-qaybgalayaasha Hargeysi waa in ardaydu ka qalinjabinayaan dugsiyada ay dhigtaan, taas oo hubinaysa in faca ku xigaa uu yahay mid wax bartay.

*Waa ay iska fiican tahay maxaayeelay waxa aannu leennahay nidaam waxbarasho oo shaqaynaya, kaas oo aannu mustaqbalka ka helayno fac wax bartay. (KQ40 - Xoolo-dhaqde helay waxoogaa/dhammeeyay waxbarasho dugsi hoose)*

*Waa ay iska fiicantahay maxaayeelay waxa aan haysannaa dad badan oo wax dhigta, dhammeeya waxbarashada oo ka qalinjabiya dugsiyada iyo jaamacada dalka oo dhan. (KQ39 - Xoolo-dhaqde helay waxoogaa/dhammeeyay waxbarasho dugsi hoose)*

*Haddii aad eegtid dugsiyada dowladda iyo kuwa gaarka ah, labaduba waxa ay leeyihiin waxbarasho fiican. (KQ29 - Qof ka shaqeeya Waxbarashada iyo Tabobarka Farsamada iyo Xirfadaha)*

Si kasta ha noqotee, si lamid ah helitaanka waxbarashada, tayada waxbarashada waxaa la sheegay in ay ku kala duwan yihiin miyiga iyo magaalada Hargeysa; iyada oo deegaannada miyiga ahi ay helaan waxbarasho heerka tayadeedu aad u hoosayso. Ka-qaybgalayaasha Hargeysa sidoo kale waxay sheegeen in jiritaan la'aanta nidaamin la xidhiidha tabobarka barayaashu ay tahay walaac weeyn oo ku aaddan tayadada waxbarashada, taas oo ay barbarsocoto khayraadka oo yari.

*Dhinacyada dalku waa ay ku kala duwan yihiin tayada waxbarashada, waxayna ku xidhan tahay lacagta la qaado. (KQ31 - Qof deggan magaalo oo aan weligii helin waxbarasho rasmi/toos ah)*

*Nidaamka waxbarasho ee dalkayagu waxa uu u baahan yahay jaangooyn, iyada oo loo marayo hagaajinta tayada ee heerarka kala duwan oo dhan. (KQ28 - Qof ka shaqeeya Waxbarashada Aasaasiga ah ee Bedelka ah/Waxbarashada Dadban (ABE/NFE))*

*Waxa laga yaabaa in aan wax tabobar ah la siinin bare afeed ama saynis. Waxyaabo badan oo aan sax ahayn ayaan ku arkay waaxdeenna waxbarashada. (KQ27 - Qof ka shaqeeya waxbarashada dugsiga sare)*

*Waxoogaa ayaa ay liidataa. Qodobo u sabab ah ayaana jira; waxbarashada barayasha dugsiyada hoose iyo sidoo kale sare ayaa hoosaysa, mushaharka oo yar, dhiirigelin la'aan, tabobar la'aan ka jirta heerarka Wasaaradda, gobolka iyo dugsiga, iyo midaysnaanta manhajka oo liita. (KQ24 - Masuul waxbarasho oo dowladeed oo masuul ka ah Waxbarashada iyo Tabobarka Farsamada iyo Xirfadaha (TVET))*

## WAAYO-ARANIMADA SHAKHSIGA AH EE WAXBARASHADA SOOMAALIYA/SOMALILAND

Ka-qaybgalayaasha waxa aannu weydiinnay, 'fadlan noo sheeg waayo-aragnimadaada shakhsiga ah ee la xidhiidha waxbarashada Soomaaliya/Somaliland'. Waxa ay ku eegi karayeen waxbarashada ay heleen, waxbarashada ay jeclaan lahaayeen in ay qaataan balse ayna helin, ama labadaba.

Ka-qaybagalayaasha Muqdisho waxa ay muujiyeen ku qanacsanaan la xidhiidha waxbarashada ay heleen, oo u dhaxaysay dugsi hoose, sare ilaa heerarka mastarka iyo PhD. Tani waxa ay ku badnayd masuuliyiinta waxbarashada ee dowladda.

*Soomaaliya gudaheeda ayaan wax ku bartay laga bilaabo dugsi hoose ilaa shahaadada koowaad ee jaamacadda. Dhanka tayada, waan ku qanacsanaa waxbarashada aan helay. Waayo-aragnimadayda intii aan ku gudojiray waxbarashadu waxay ahayd mid wanaagsan. (KQ2 - Masuul waxbarasho oo dowladeed oo masuul ka ah dugsiyada sare)*

*Waayo-aragnimo wanaagsan ayaan kahaystaa waxbarashada Soomaaliya. Waxa aan ka qalinjabiyay Jaamacadda SIMAD sannadkii 2007, intaas kadibna waxa aan u gudbay shahaadada heerka labaad iyo PhD. (KQ5 - Masuul waxbarasho oo dowladeed oo masuul ka ah Tacliinta Sare)*

Qaar kamid ah ka-qaybgalayaasha Muqdisho ayaa dhanka kale aan helin wax waxbarasho ah, in kasta oo ay doonayeen sababo la xidhiidha duruuftii dalka, sida colaado horseeday barakac, oo ka-qaybgalayaasha qaar kamid ah u saamixi weyday in ay dhammaystaan waxbarashadooda. Awoodda maaliyadeed ayaa ahayd sabab kale oo loo soo qaatay in aan la sii wadin waxbarashada, iyada oo la codsaday waxbarasho bilaash ah iyo deeqo waxbarasho.

*Mar kasta waxa aan doonayay in aan helo waxbarasho balse sababo badan awgood, fursaddaas ma aan helin. Waxbarashada keliya ee aan helay waa tii dugsi quraanka. (KQ17 - Qof deggan miyiga oo aan weligii helin waxbarasho rasmi ah)*

*Waayo-aragnimo u ma lihi waxbarashada Soomaaliya. Wax ma aanan baran. Balse carruurtayda ayaa aada dugsiyada, taas ayuun baan ka ogahay waxbarashada Soomaaliya. (KQ19 - Xoolodhaqato reer miyi ah oo aan weligii helin waxbarasho rasmi ah)*

*Caqabado badan ayaan kala kulmay xasaraddii iyo barakacii. Waxa aan u baahnaa waa waxbarasho bilaash ah. Sidoo kale waxaan u baahnaa deeq waxbarasho si aan u helo tacliin sare. (KQ6 - Qof ka shaqeeya waxbarashada dugsiga hoose)*

*Anigu waa aan jeclaan lahaa in aan helo waxbarasho ka tayo sarraysa tii aan helay. Waxbarasho bilaash ah ama deeqo waxbarasho waa ay i anfici lahayd. (KQ7 - Qof ka shaqeeya waxbarashada dugsiga sare)*

*Hayaan dheer oo waxbarasho oo ay ku duugan tahay waayo-aragnimo fiican ayaan leeyahay. Waxa aan dhammeeyay waxbarashadii dugsiga hoose. Waxa aan doonayay in aan sii wato waxbarashada, balse iima ay suurtogelin. Sidoo kale berigaas waxaan doonayay waxbarasho ka tayo sarraysa. (KQ20 - Xoolodhaqato reer miyi ah oo helay waxoogaa/dhammeeyay waxbarasho dugsi hoose)*

*Siddeetamaadkii waxaan helay waayo-aragnimo waxbarasho oo wanaagsan, waa xilligii dowladdii hore ay weli shaqaynaysay. Waxaan dhameeyay waxbarashadii dugsiga hoose xilligaas. Waxaan rabay in aan sii wato waxbarasho, balse taasi ma ay dhicin. (KQ12- Qof deggan magaalada oo helay waxoogaa/dhammeeyay waxbarashada dugsiga hoose)*

Laba ka-qaybgale oo ka shaqeeya waxbarashada oo ku sugan Muqdisho ayaa wax ku soo bartay dibadda; Ingiriiska iyo Kanada.

*Waayo-aragnimo [Shakhsi ah] uma lihi waxbarashada Soomaaliya. Ingiriiska ayaan wax ku bartay. (KQ9 - Qof ka shaqeeya Waxbarashada iyo Tabobarka Farsamada iyo Xirfadaha (TVET)*

*Wax kumaan baran Soomaaliya; Kanada ayaan wax ku bartay. (KQ10 - Qof ka shaqeeya waxbarashada Tacliinta Sare)*

Ka-qaybgalayaasha Hargeysa waxaa ku badnaa in ay ka hadlaan waayo-aragnimadooda shakhsiga ah ee tacliinta sare oo ahaa kuwo togan. Ka-qaybgalayaashan oo dhammaantood ah masuuliyiin dowladeed ama dad ka shaqeeya waxbarashada, waxa ay inta badan tilmaameen shahaadooyin badan oo ay haystaan.

*Waxa aan ka qalinjabiyay jaamacadda oo aan ka qaatay shahaadada heerka koowaad, dhowaanna waxa aan qorshaynayaa in aan bilaabo masterska. Waxaan doonayaa*

*in aan gaadho heer PhD haddii Alle idmo. (KQ21 - Masuul dowladeed oo masuul ka ah waxbarashada dugsiga hoose)*

*Waxa aan dhigtay cilmiga waxbarashada, oo aan ka haysto Jaamacadda Camuud shahaadada Biochemistry. Ilaa 2006dii ayaan ka shaqaynayay waxbarashada. Waxaan ahaa bare, hage iyo tobobare tabobarayaal (ToT). Agaasime ayaan ka ahay xarunta Wasaaradda ee Hargeysa. Waxaan ka fikirayaa in aan waxbarashada sii wado ilaa heer PhD. ( KQ22 – Masuul waxbarasho oo dowladeed oo ka masuul ah dugsiyada sare)*

*Waxaan gaadhay heerka shahaadada mastarka, heerka labaad ee tacliinta sare, waxa aanan qorshaynayaa in aan gaadho heerka saddexaad ee PhD. Mustaqbalka waan u han weynahay. (KQ23 - Masuul waxbarsho oo dowladeed oo masuul ka ah Waxbarashada Aasaasiga ah ee Bedelka ah/Waxbarashada Dadban (ABE/NFE))*

*Laba shahaado oo masters ah ayaan haystaa, mid ay ku saabsan Waxbarashada. Ku dhawaad 30 sano oo waayo-aragnimo ah ayaan u leeyahay waxbarashada; toddoba sano oo Yaman ah, shan sano oo Liibiya ah, 15 sano waxaan kamid ahaa hormuuddada Jaamacadda Camud, labadii sano ee u danbeeyay na waxaan ahaa Agaasimaha Guud ee Tacliinta Sare ee Somaliland. Noloshayda shaqo oo dhan waxaan ku qaatay waxbarashada. (KQ25 - Masuul waxbarasho dowladeed oo masuul ka ah Tacliinta Sare)*

*waxaan haystaa labo shahaado jaamacadeed; Shahaadada koowaad shaybaarka, talabaadna waa caafimaadka guud. Waxaan jeclaan lahaa inaan yeesho takhasus caafimaad si aan u noqdo dhaqtar buuxa. (KQ28 – Waxbarashada Aasaasiga ah ee Bedelka ah/Waxbarashada Dadban (ABE/NFE))*



**tusmo**: *arday u diyaar garoobaysa imitixaankii fasalka afraad ee loogu gudbo heerka jaamacadda*

***tixraac:*** *: https://www.horndiplomat.com/2018/07/02/somaliland-national-exams-for-intermediate-and-secondary-schools-begin/*

Qaar kale oo kamid ah ka-qaybgalayaasha Hargeysa ayaa ka warramay heerar fursadeed oo ka duwan taas oo la xidhiidha helitaanka waxbarashada; iyada oo had iyo jeer aan helin khiyaarkaas. Qof deggen dhul miyi ah ayaa faahfaahiyay in maadaama uu yahay qof weeyn, aanay mudnaan u ahayn in uu helo waxbarasho marka la barbardhigo carruurta aadda dugsiyada. Qof kale oo deggen miyiga ayaa sheegay in uu rabay in uu aado jaamacad, balse markii uu dhammeeyay dugisigii hoose uu ku khasbanaaday tabobar macallinimo xaaladdo isaga u gaar ah awgood.

*Ma aan helin fursad aan ku aado dugsi markii aan yaraa, da'dan maanta aan ahayna ma doonayo sababta oo ah carruurta ayaa mudnaanta la siiyaa (KQ31 – Qof deggen magaalo oo aan weligii helin waxbarasho rasmi ah)*

*Waxa aan dhammeeyay dugsi hoose waxaanan rajaynayay in aan gaadho heerar kasii sarreeya, balse caqabado ayaa ila soo gudboonaaday sababo jiray awgood. (KQ32 - Qof deggen magaalo oo helay waxoogaa/dhammeeyay waxbarasho dugsi hoose)*

*Waxa aan gaadhay heer jaamacadeed, balse caqabado ayaa isoo waajahay oo waan joojiyay waxbarashadaydii. Waan jecelahay in aan dib u bilaabo waxbarashadaydii jaamacadda waxaanan rajaynaya inaan awood u yeesho inaan sii wado. Mustaqbalka waxaan rajaynayaa in aan ku laabto jaamacadda. (KQ35 - Qof deggen magaalo oo helay waxoogaa/dhammeeyay TVET)*

*Weligay wax ma dhigan balse waan jecelahay in aan wax barto. Da' dhexeaadkaygan ma jari karo waxbarasho. Tacliintu waa waxa ugu fiican ee qofku ka faa'idi karo. Waan jecelahay in aan wax barto balse imminka ma bilaabi karo. Weligay markaan yaraa dugsi ma aadin. (KQ37 - Qof deggen miyiga oo aan weligii helin waxbarasho rasmi ah)*

*Waxaan doonayay in aan gaadho heer jaamacadeed balse maan helin fursaddaas. Waan jecelahay in aan waxbarto balse ma awoodi karo. Waxa aan dhammeeyay dugsi hoose kadibna waxaan ku biiray tabobarka barayaasha oo qaatay laba sanadood. (Qof deggen miyiga oo helay waxoogaa/dhammeeyay dugsi hoose)*

*Weligay maan gelin dugsi, balse waan jecelahay in aan dhammaystirto tacliintayda; ma geli karo imminka. Waxa aan akhrin karaa af Soomaaliga oo keli ah. (KQ39 - Xoolo dhaqato reer miyi ah oo aan weligii helin waxbarasho rasmi ah)*

## SAAMAYNTA KOOFIDH-19 IYO KA-FALCELINTIISU KU YEESHEEN WAXBARASHADA

Ka-qaybgalayaasha waxaanu weydiinnay, 'Dhibaato intii le'eg ayaa Koofidh-19 iyo falcelinnada laga bixiyay u geysteen waxbarashada Soomaaliya/Somaliland?'

**Shaxda 5aad: Saamaynta Koofidh-19 iyo ka-falcelintiisu ku yeesheen waxbarashada – Muqdisho**

| Dhibaato intee le'eg ayaa Koofidh-19 iyo falcelinnada laga bixiyay u geysteen waxbarashada Soomaaliya/Somaliland? | | | |
|---|---|---|---|
| Dhibaato badan | Dhibaato yar | Dhibaato umay geysan | Garan maayo/ jawaab la'aan |
| 19 | 1 | 0 | 0 |

**Shaxda 6aad: Saamaynta Koofidh-19 iyo ka-falcelintiisu ku yeelatay waxbarashada – Hargeysa**

| Dhibaato intee le'eg ayaa Koofidh-19 iyo falcelinnada laga bixiyay u geysteen waxbarashada Soomaaliya/Somaliland? | | | |
|---|---|---|---|
| Dhibaato badan | Dhibaato yar | Dhibaato umay geysan | Garan maayo/ jawaab la'aan |
| 20 | 0 | 0 | 0 |

95% ka-qaybgalayaasha Muqdisho waxay sheegeen in 'Dhibaato badan' uu Koofidh-19 gaadhsiiyay waxbarashada, iyada oo hal ka-qaybgale uu ku jawaabay in 'Dhibaato yar' ay Koofidh-19 iyo ka-falcelintiisu ay gaadhsiiyeen waxbarashada. Ka-qaybgalahani waxa uu awooodda saaray oo keli ah inaan carruurtu jidh ahaan u tegi karin dugsiyada.

> *Dhibaatada keli ah ee aan aragnay waa xidhitaanka dugsiyda. Carruurtu ma tagaan dugsiyada fayraska awgeed. Dhibaatadu waa taas oo keli ah. (KQ17 - Qof deggen miyiga oo aan weligii helin waxbarasho rasmi ah)*

Laba ka-qaybgale oo ku sugan Muqdisho ayaa si gaar ah u xusay in dowladdu ayna diyaar u ahayn Koofidh-19, sidaas darteedna dalka oo dhami aanu diyaar u ahayn safmareenka. Taasi waxay si taban u saamaysay nidaamka waxbarashada.

> *Heerka wasaaradda, diyaar u maannaan ahayn arrinkan. Sidaas awgeed, waxbarashadii ayaa ka joogsatay arday farabadan. (KQ3 - Masuul waxbarasho dowladeed oo masuul ka ah Waxbarashada Aasaasiga ah ee Bedelka ah/Waxbarashada Dadban (ABE/NFE))*

> *Maadaama oo aannu nahay dal aan horumarsanayn, diyaar uma aannan ahayn safmareen xaddigan le'eg, gaar ahaan nidaamkayaga waxbarashadu diyaar uma uusan ahayn. Sidaas darteed, aad ayay noo saameeyeen fayraska iyo xidhitaanka dugsiyadu. (KQ16- Qof deggen magaalada oo helay waxoogaa/dhammeeyay Tacliin Sare)*

Xidhitaanka dugsiyada waxaa la sheegay in uu saamayn weeyn ku yeeshay waxbarashada Muqdisho, isaga oo ardaydii ku khasbay inay joogaan guryahooda. Joogto la'aanta maalgelinta dugsiyada xilligay xidhnaayeen ayaa abuurtay cabsi ah inay xidhitaankoodu sii socdo.

> *Waxbarashadii waa ay joogsatay. Ardaydii guryaha ayay joogaan. Taasi waa dhibaato badan oo gaadhay dhammaantayo. (KQ14 - Qof deggen magaalada oo helay/dhammeeyay ABE/NFE)*

> *Dugsiyada Soomaaliya gebi ahaanba waxay u badan yihiin kuwo gaar ah, oo iyagu lacagta ay ardayda ka qaadaan isku maalgeliya. Markay waxbarashadii joogsatay, dugsiyadii waa ay kaceen, qaar badan oo kamid ahina si buuxda ayay u xidhmeen. Haddii aan kab la siinin, si kama dambays ah ayay u xidhmayaan. (KQ5 - Masuul waxbarasho dowladeed oo masuul ka ah Tacliinta Sare)*

Si loola dagaalamo saamaynta Koofidh-19 ee waxbarashada, habka internetka ayaa lagu soo rogay Muqdisho, haseyeeshee caqabadaha farsamo ee dalka ka jira ayaa ka dhigay kuwo aan wax ku ool ahayn. Galaangalka dadka ee internetka ayaa xaddidan marka uu shaqeeyaba, waxaa barbar socda in awoodda la saarayay waxbarashada internetka ee ardayda jaamacadaha balse aan la isku taxallujin ardayda dugsiyada hoose iyo sare. Sidoo kale way adagtahay in la la socdo tayada casharrada ku baxaya online-ka.

> *Ardaydu imminka waxay la dhibban yihiin habka online-ka ah ee waxbarashada. In badan oo kamid ahi maba geli karaan nidaamyada online ka ah. (KQ3 - Masuul waxbarasho dowladeed oo masuul ka ah Waxbarashada Aasaasiga ah ee Bedelka ah/Waxbarashada Dadban (ABE/NFE))*

> *Tiknoolajiyad ahaan, diyaar uma aannaan ahayn safmareen noocan oo kale ah. Ardayda jaamacaduhu waa ay helaan waxbarasho digital ah, balse dugsiyada hoose iyo sare waxay ka dhigan yihiin korontadii oo dantay oo la ma dhigo xiisadihii marnaba. (KQ6 - Qof ka shaqeeya dugsiyada hoose)*

> *Dadku ma qaadanayaan habka tacliinta ee online-ka ah. Xataa dadka heli karaya, tayada waxbarashadu waa liidataa, korjoogis na laguma samayn karo. (KQ8 - Qof ka shaqeeya Waxbarashada Aasaasiga ah ee Bedelka ah/Waxbarashada Dadban (ABE/NFE))*

Adeegsiga qiimaynta horumarka waxbarasho ee ardayda ee sannadadii hore, taas oo bedelaysa imitixaannadii caadiga ahaa, ayaa hal ka-qaybgale oo ku sugan Muqdisho ku tilmaamay inay tahay hab caddaalad ah. Haseyeeshee, waxaa laga cabsi qabaa in tani mustaqbalka si taban u saamayn doonto ardayda; iyada oo galdaloollo u yeelaysa aqoonta ardayga iyo guushiisa.

> *Sannad dugsiyeedku waxa uu kudhawaa gebagebo kadibna wuu istaagay. Ardaydu waxa ay waayeen ku dhowaad hal sano oo kamid ah waxbarashadoodi. Qiimayn ayaa loo sameeyay ardayda. Waa waxii ugu yaraa ee loo qaban karaayay. (KQ7 - Qof ka shaqeeya dugsiyada sare)*

> *Galdaloollo ayaa ka jira hannaanka [waxbarashada] dhowrkii bilood ee ugu danbeeyay. Intayada badan waxay noo ahayd fursad ku ilowno wixii aannu barannay. Nidaamka waxbarashada online-ka ee la bilaabay isna caqabad ayuu ku noqday dad badan. Imtixaanaadka qaranka waxaa loo fadhiistay iyada la qiyaasayo in ardaydu ay heleen waxbarasho online ah, taasina weligood saamayn ayay ku yeelanaysaa. (KQ10 - Qof ka shaqeeya Tacliinta Sare)*

> *Imminka oo ardaydu u fadhiisanayaan imtixaannadooda qaran, waxay waajahayaan dhibaatooyin badan sababta oo ah saddex bilood ayay guriga joogeen iyaga oo aan helin waxbarasho macquul ah ama naqtiin. (KQ20 - Xoolo-dhaqato helay waxaagaa/dhammeeyay dugsi sare)*

100% ka-qaybgalayaasha Hargeysa waxay ku jawaabeen in 'Dhibaato badan' ay Koofidh-19 iyo ka-falcelintiisu gaadhsiiyeen waaxda waxbarashada.

Si lamid ah Muqdisho, Ka-qaybgalayaasha Hargeysi waxay sheegeen in xidhitaanka dugsiyadu ay dhibaato weeyn keentay; gaar ahaan ay saamaysay ardayda wax dhiganaysay 2020.

> *Dhaawac weeyn ayay keentay, dhowaan ayaa laga soo kabanayaa haddii Alle idmo. (KQ40 - Xoolo-dhaqato helay waxoogaa/dhammeeyay dugsi hoose)*

> *Dhammaan xarumaha waxbarashada ayaa la xidhay muddo shan bilood ah taas oo dhaawacday waxbarashada sannadkan 2020-2021. (KQ33 - Qof deggen magaalada oo helay waxoogaa/dhammeeyay dugsi sare)*

> *Dhaawac ayay geysatay sababta oo ah ku dhowaad 1600 oo xarun waxbarasho ayaa la xidhay Koofidh-19 awgeed bishii Maarso ee sannadkan. Waa aynu sawiran karnaa sida taban ee ay u saamaysay waaxda waxbarashada; oo ah waaxda ay ugu saamaynta badan tahay Somaliland. (KQ24 - Masuul waxbarasho dowladeed oo masuul ka ah Waxbarashada iyo Tabobarka Farsamada iyo Xirfadaha (TVET))*

Si wax looga qabto suurtogal la'aanta waxbarashada tooska ah, Ka-qaybgalayaasha Hargeysi waxay sheegeen in la bilaabay habab waxbarasho oo online ah sida Zoom oo kale. Halbeegyadu ma ay dejisnayn, iyada oo helitaanka dadka ee internetku xaddidan yahay.

> *Waxbarashadii waa la laalay, waa la xidhay dhammaan dalka oo dhan. Wax badan ayaannu tabaynay/naga maqnaa, balse waxaannu badh ahaan u guurnay waxbarashada online-ka ah. Hababkani ma buuxinayaan halbeegyadii loo baahnaa. (KQ36 - Qof deggen magaalada oo helay/dhammeeyay Tacliin Sare)*

> *Tusaale ahaan, dhibaatooyinka Koofidh-19 waxaa kamid ah in dadka saboolka ahi ayna awoodi karin koorsooyinka online-ka ah sababta oo ah internet ma helaan. Koorsooyinka ku baxa Zoom sidoo kale waa ay liitaan. (KQ28 - Qof ka shaqeeya Waxbarashada Aasaasiga ah ee Bedelka ah/Waxbarashada Dadban (ABE/NFE))*

Ka-qaybgalayaasha Hargeysa, iyaga oo tilmaamaya jawaab lamid ah kuwa Muqdisho, waxay sabab kale oo dhibaato keentay ku sheegeen inay la xidhiidho imtixaannada iyo buundooyinka ardayda. Hal ka-qaybgale ayaa walaac ka qabay in ardaydu ayna gaadhin heer ku filan inay u gudbaan sannad dugsiyeedka soo socda si caadi ah.

> *Waxay ku gudbeen qiimaynta buundooyinkoodi imtixaannadii hore, sannadka soo socda na waxaa caqabad ku noqonaysa isku xidhka maaddooyinka manhajka. (KQ30 - Qof ka shaqeeya tacliinta sare)*

> *Carrurtu waxay iskaga tageen maaddooyinkii manhajka, caqabado ayay waajihi doonaan markay ku laabtaan dugsiga. Waxaa cad in Koofidh-19 uu si adag u dhaawacay nidaamka waxbarashada uuna u baahan yahay in uu si buuxda uga soo kabto. (KQ27 - Qof ka shaqeeya dugsi sare)*

> *Isla markiiba waxa uu saameeyay nidaamka waxbarashada: waxbarasho ahaan, nidaam ahaan iyo gudbinta natiijadii loo baahnaa marka la eego qorshaha tacliineed. (KQ23- Masuul waxbarasho dowladeed oo masuul ka ah Waxbarashada Aasaasiga ah ee Bedelka ah/Waxbarashada Dadban)*

## KA-FALCELINTA WAXBARASHADA EE KOOFIDH-19

Ka-qaybgalayaasha waxaannu weydiinnay, 'Soomaaliya/Somaliland ma ku og tahay ka-falcelin waxbarasho oo togan oo ku aaddan Koofidh-19?

**Shaxda 7aad: Ka-falcelinta Waxbarasho ee Koofidh-19 – Muqdisho**

| Soomaaliya/Somaliland ma ku og tahay ka-falcelin waxbarasho oo togan oo ku aaddan Koofidh-19? | | | |
|---|---|---|---|
| Falcelinno badan | Falcelinno yar | May | Ma garanayo/ Jawaab la'aan |
| 4 | 10 | 5 | 1 |

**Shaxda 8aad: Ka-falcelinta Waxbarasho ee Koofidh-19 – Hargeysa**

| Soomaaliya/Somaliland ma ku og tahay ka-falcelin waxbarasho oo togan oo ku aaddan Koofidh-19? | | | |
|---|---|---|---|
| Falcelinno badan | Falcelinno tiro yar | May | Ma garanayo/ Jawaab la'aan |
| 9 | 11 | 0 | 0 |

Kalabadh Ka-qaybgalayaasha Muqdisho waxay xasuusan kareen tusaalayaal 'Tiro yar' oo moojinaya ka-falcelin waxbarasho oo togan oo ku aaddan Koofidh-19, iyada oo 25% ay ku jawaabeen 'May'.

Ka-qaybgalayaasha Muqdisho waxay sheegeen in bilaabista waxdhigista habka online-ku ay u horseedday barashada xirfado digital oo cusub iyaga oo guriga jooga. Hal ka-qaybgale oo magaalada deggan ayaa sheegay in qoysasku sidoo kale imminka awoodaan inay wakhti badan wada qaataan.

> *Safmareenka waxaannu helnay waayo-aragnimo togan oo fiican; waxaannu barannay xirfado digital intii lagu gudo jiray. Arrin kale oo togan waa in aannu iminka diyaar u nahay safmareen kale. (KQ16 - Qof deggan magaalada oo helay/dhammeeyay Tacliin Sare)*

> *Haatan, ardayda iyo waalidkooda guryaha ayay joogaan oo wakhti ayay isu helaan si ay u sheekaystaan sidii hore in ka badan. waxaannu sida oo kale barannay agabyo digital si aannu u sii wadanno waxbarashadayada. (KQ14 - Qof deggan magaalada oo helay/dhammeeyay ABE/NFE)*

> *Waxbarashada iyo akhris/qoraalka digitalku ayaa imminka qeyb ka ah xirfadaha carruurteenna. (KQ12 - Qof deggan magaalada oo helay/dhammeeyay dugsi hoose)*

Si ka duwan dareenka taban ee ka-qaybgalayaasha Muqdishu ka bixiyeen qiimaynta beddelka u ah imtixaanka ardayda, hal ka-qaybgale oo deggan miyiga ayaa tilmaamay dheefta ay tani leedahay; taas oo ah in laga helayo ugu yaraan hab lagu qiimeeyo horumarka aqooneed ee ardayda.

> *Hal ka-falcelin oo togan waa in ardayda loo qiimeeyay buundooyinkoodi. Taas ayaa ahayd ka-falcelin waxbarasho oo togan. (KQ18 - Qof deggan miyiga oo helay waxoogaa/dhammeeyay dugsi hoose)*

Ka-qaybgalayaasha Muqdisho waxa ay garawsan yihiin in go'aanka dowladda ee xidhitaanka dugsiyadu uu badbaadiyay nolosha dadyow badan, si lamid ah bilowga agabka is-ilaalada shakhsiga ah (PPE). Haseyeeshee, hal qof oo ka shaqeeya TVET ayaa sheeegay in falcelintani ahayd mid yar, oo aad u soo daahday. Laba ka-qaybgale ayaa ku dooday in hannaankani suurtogalinayo in dowladdu sii wanaajiso diyaargarowgeeda mustaqbalka.

> *Ka-falcelintu waa ayna caawisay sababta oo ah carruurtayadu imminka waa ay badqabaan sababta oo ah guryaha ayay joogaan oo ma qaadayaan fayraska. (KQ17 - Qof deggan miyiga oo aan weligii helin waxbarasho rasmi ah)*

> *Ka-falcelinta togan waxaa kamid ah ogaanshaha muhiimadda joogitaanka guriga iyo kala fogaanshaha. Dugsiyada qaar ayaa xataa bixiyay agab PPE. Haseyeeshee, waa ay hoosaysay ka-falcelinta Wasaaradda Waxbarashadu. Ka-falcelinno togan ayaa jira, balse aad ayaa loo la soo daahay. (KQ9 - Qof ka shaqeeya Waxbarashada iyo Tabobarka Farsamada iyo Xirfadaha (TVET))*

> *Hal falcelin oo togan waa in dowladdu imminka garawsan tahay muhiimadda ay leedahay in ay diyaar u noqoto mushkilad noocan oo kale ah. (KQ3 - Masuul waxbarasho dowladeed oo masuul ka ah Waxbarashada Aasaasiga ah ee Bedelka ah/Waxbarashada Dadban (ABE/NFE)*

> *Haddii uu Koofidh-19 leeyahay hal natiijo oo togan, waa in aannu iminka diyaar u nahay safmareen kale sababta oo ah waxa aannu og nahay waxa loo baahan yahay in la qabto. (KQ6 - Qof ka shaqeeya waxbarashada dugsiga hoose)*

Ka-qaybgalayaasha Muqdisho oo dhami may xusi karin falcelin waxbarasho oo togan. Qof ka shaqeeya tacliinta sare ayaa sheegay in da' yartu ayna wax ku baran karin dhextaallada online-ka ah.

> *Gebi ahaanba maya. Ma sawiran karo arday siddeed jir ah oo hor fadhiya kombiyuutar si uu casharro ugu qaato online. Anigu sidaas u ma arko falcelin togan. (KQ10 - Qof ka shaqeeya tacliinta sare)*

Dhanka kale, ka-qaybgalayaasha Hargeysa waxay sheegeen tusaalayaal 'Tiro yar' oo muujinaya falcelin togan oo lamid ah dhiggooda Muqdisho. Haseyeeshee, 45% ka-qaybgalayaasha Hargeysa sida oo kale waxay ka warrameen in ay jiraan tusaalayaal 'Farabadan' oo muujinaya falcelin waxbarasho oo togan oo ku aaddan Koofidh-19.

Ka-qaybgalayaasha Hargeysa waxay sheegeen in ay falcelin togan tahay hababka waxdhigasho ee beddelka ah kadib xidhitaankii dugsiyada, in kasta oo ay jiraan caqabado dhowr ah sida waayo-aragnimo la'aan iyo in ayna gaadhin cid kasta oo u baahnayd. Barnaamijyada internetka sida Zoom, telefishanka iyo raadiyaha ayaa loo adeegsaday in la isku xidho barayaasha iyo ardaydooda, iyada oo barnaamij waxbarasho oo raadiyow loo bixiyay *Hawada ka baro;* barnaamijkan ayaa loo adeegsaday in uu bedelo waxbarashadii tooska ahayd ee ardayga iyo macallinka. Taageerada falcelinta ayaa la sheegay in awoodda lagu saaray ardayda jaamacadaha oo aan mudnaan la siinin ardayda dugsiyada hoose, sare ama waxbarashada dadban (NFE).

> *Barayaasha iyo dugsiyada waxaa lagu wargeliyay koorsooyinka laga baahinayo raadiyaha iyo telefishannada, halka koorsooyinka jaamacadda lagu bixinayo Zoom iyo Barnaamijyada Google; in kasta oo ay jirto inaan la isku hallayn karin internetka iyo waayo-aragnimo la'aanta dhanka adeegsiga Zoom iyo Barnaamijyada Google. Sidaas darteed, isku day wanaagsan ayay ahayd. (KQ28 - Waxbarashada Aasaasiga ah ee Beddelka ah/Waxbarashada Dadban (ABE/NFE)*

> *Waxaa jiray habraac loogu talogalay in la duubo casharrada qeybta labaad ee sannad dugsiyeedka oo laga baahiyo telefishanka iyo Raadiyaha Hargeysa. Internetku waxa uu ahaa khiyaar kale, oo inta badan loo adeegsaday waxbarashada gaarka ah oo ay ku jiraan jaamacaduhu. Waxaan leeyahay lama gaadhin 100% carruurtii loogu talogalay sababta oo ah dedaalkan oo aan ku filnayn iyo awoodda caruurta oo qaar kamid ahi ayna haysan telefishanno ama raadiyow. (KQ22 - Masuul waxbarasho dowladeed oo ka shaqeeya dugsiyada sare)*

> *Wasaaraddu, iyada oo xidhiidhinaysa waxna ku biirinaysa daneeyayaasha kale ee waxbarashada waxay hindistay barnaamij la yidhaahdo Hawada ka Baro oo ardaydu dugsiyadooda ay casharro kaga heleen barnaamijyo telefishan iyo raadiye, WhatsApp, Zoom iyo xataa Facebook. (KQ23 - Masuul waxbarasho dowladeed oo masuul ka ah Waxbarashada Aasaasiga ah ee Beddelka ah/Waxbarashada Dadban (ABE/NFE))*

> *Qaar kamid ah ardayda jaamacaha ayaa nasiib u helay nidaamyada ugu wanaagsan iyaga oo adeegsanaya, halka saamaynta taban ugu badan ee waxbarashada online-ka ahi ku dhacday dugsiyada hoose. (KQ35 - Qof deggen magaalada oo helay waxoogaa/dhammeeyay TVET)*

Ka-qayabgalayaasha Hargeysa waxay sidoo kale diiwaangeliyeen falcelinno taban, iyaga oo sheegaya in aan la tixgelin siyaaqa maxalliga ah intii lagu gudo jiray xirnaanshihii dugsiyadu iyo in aan la tixgelin waaxda TVET.

> *Sidoo kale waxaa jiray falcelinno taban, sida in la laalay waxbarashada iyada oo aan la qiimaynin xaaladaha kala duwan ee dalkeenna, magaalo iyo miyo, iyo sida ay taasi u saamayn karto kooxaha bulsho ee kala duwan. (K30 - Qof ka shaqeeya tacliinta sare)*

> *Falcelinno badan ayaa jiray, balse waan kasoo horjeedaa qaar kamid ah tallaabooyinka ay qaadday Wasaaradda Waxbarashadu. Markii la xidhay dugsiyadii farsamada, dugsiyadii kale waxay ku shaqaynayeen online. Falcelinno togan lama samaynin. (KQ29 - Qof ka shaqeeya Waxbarashada iyo Tabobarka Farsamada iyo Xirfadaha (TVET))*

## SAAMAYNTA WAXBARASHO EE UU KU YEESHAY KOOXAHA DANYARTA AH

Ka-qaybgalayaasha waxa aannu weydiinnay, 'Ma garanaysaa saamayn togan ama taban oo KOOFIDH-19 iyoka falcelintiisu ku yeesheen waxbarashada dadka danyarta ah? (xoolo-dhaqatada reer guuraaga ah, dadka reer miyiga ah, dumarka, carruurta, IDPs, shaqaalaha dabaqadda hoose, dadka beelaha laga tirada badan yahay, dadka aan wax akhriyin wax na qorin).'

Ka-qaybgalayaasha Muqdisho waxa ay sheegeen oo keli ah falcelinno taban oo la xidhiidha waxbarashada kooxaha danyarta ah, iyaga oo xusaya in helitaanka waxbarashadu kamid yahay dhibaatooyinka kooxahan. Sababta ugu weeyni waa kooxahani inaysan internet helin ama agabkii lagu heli lahaa waxbarashada digital-ka ah. Hal qof oo ka shaqeeya TVET ayaa sidoo kale sheegay in aan la tixgelin kooxaha danyarta ah markii laga falcelinayay KOOFIDH-19 ee dhanka waxbarashada.

> *Waa mid taban. Inta ugu badan dadka danyarta ah waa ay ka maqan yihiin nidaamka waxbarashada maadaama ayna haysan agabkii digitalka ahaa sida kombiyuutarro iyo internet, marka laga reebo in yar oo heli karta barnaamijyada*

*waxbarasho ee raadiyaha. (KQ16- Qof deggan magaalo oo helay waxoogaa/dhammeeyay Tacliin Sare)*

*Dadka danyarta ah waxay dareemayaan sidii hore oo kale. KOOFIDH-19 ka hor waxaan dareemaynay in nalaga tegay, imminka waa sidii hore oo kale. (KQ17 - Qof deggan miyiga oo aan weligii helin waxbarasho rasmi ah)*

*Waxdhigashadii way ka joogsatay. Moobillada casriga ah iyo adeegsiga internetku waa ku qaali ah iyaga oo ma heli karaan. (KQ12 - Qof deggan magaalada oo helay waxoogaa/dhammeeyay dugsi hoose)*

*Ma awoodi karaan inay helaan waxbarashada cusub ee habka digitalka ah. Waxaan garanayaa dad laga fursado badan yahay oo ku khasban in $5 toddobaadkii ku bixiyaan internetka si ay u helaan casharrada online-ka ah. Xaddigaasi waa ka badan yahay dakhligooda toddobaadkii. (KQ10 - Qof ka shaqeeya tacliinta sare)*

Laba ka-qaybgale ayaa ka warramaay in Muqdisho uu kordhay nuglaanshiyihii carruurtu, gaar ahaan hablaha, oo imminka wakhti badan ku qaadanaya guriga. Waxaa la sheegay inay halis dheeraad ah ugu jiraan rabshad iyo ka-faa'idaysi.

*Habluhu guriga ayay joogaan oo wakhti badan ayay la qaadanayaan qoysaskooda. Waxay u nugul yihiin guur khasab ah ama degdeg ah. (KQ16 - Qof deggan magaalada oo helay waxoogaa/dhammeeyay tacliin sare)*

*Guriga waxaa ii jooga carruur aan waxbarasho qaadanaynin. Joogistooda waxaa la kordhaysa rabshadda iyo qaxarka guriga sababta oo ah wax ay qabtaan ma hayaan. (KQ15 - Qof deggan magaalada oo helay waxoogaa/dhammeeyay TVET)*

Xidhitaanka dugsiyada ee Muqdisho awgeed, ka-qaybgalayaashu waxay sheegeen in shaqaalihii dakhliga hooseeyay ee inta badan ka shaqeeya dugsiyada inay lacagtu ku yartahay haddeer maadaama ay shaqooyinkoodi waayeen.

*Qaar kamid ah dadka danyarta ah (laga fursadaha badan yahay) waxay ka shaqayn jireen xarumaha waxbarashada si ay u la soo baxaan maciishaddooda. Taasi imminka waa ay istaagtay. Caqabado maaliyadeed ayaa imminka soo food saaray oo ku aaddan kharashaadka carruurtooda maadaama ay guryaha joogaan oo ayna shaqaysanaynin. (KQ18 - Qof deggan miyiga oo helay waxoogaa/dhammeeyay dugsi hoose)*

*Dadka qaar ayaa saamayn shaqo oo taban ay ku yeelatay arrintani maadaama dugsiyadii iyo jaamacadihii ay ka shaqayn jireen ay xidhan yihiin. (KQ8 - Qof ka shaqeeya Waxbarashada Aasaasiga ah ee Beddelka ah/Waxbarashada Dadban(ABE/NFE))*

Ka-qaybgalayaasha Hargeysa waxay tilmaameen in aan tixgelin gaar ah la siinin dadka danyarta ah (laga fursadaha badan yahay) intay socotay falcelinnadii KOOFIDH-19, gaar ahaan dhanka waxbarashadooda. Dadka danyarta ah waxay marka horaba ku jiraan xaalad kakan, falcelintuna taas ayuun bay uga sii dartay. Dayaca bulshooyinka reer miyiga ah ayaa halkiisi ka sii socday, mana ay helin taageero la barbardhigo dadka deggan magaalooyinka. Haseyeeshee, masuul waxbarasho dowladeed ayaa sheegay in raadiyayaal la qaadi karo loo qeybiyay qaar kamid ah dadka danyarta ah si ay u helaan casharrada ka baxaya raadiyaha.

*Marka ugu horraysa, falcelintu gaar uma ay ahayn koox gaar ah; waxaa loogu talogalay sii wadista waxbarashada. Kooxahaas laga tirada badan yahay ka hor KOOFIDH-19 ayay xayirnaayeen, sidoo kalena KOOFIDH-19 si xun ayuu u saameeyay. Ma jirto qorshe u gaar ah iyaga xilligan. (KQ32 - Qof deggan magaalada oo helay waxoogaa/dhammeeyay dugsi hoose)*

*Sidaan hore u sheegay, casharro ayaa la duubay oo la tebiyay. Kooxahaas la faquuqo, waxaa loo iibiyay raadiyayaal yaryar si ay ugala socdaan casharrada la duubay. Balse ma lihi raadiyayaal ayaa la wada siiyay. Wasaaraddu waxay qorshaynaysaa inay qeybiso in kale oo dheeraad ah. (KQ - Masuul waxbarasho dowladeed oo masuul ka ah dugsiyada sare)*

*Waa la dayaycay, arrinkanina waxa uu sii biiriyay uun dayacaas ba'an ee hore u jiray. (KQ33 - Qof deggan magaalada oo helay waxoogaa/dhammeeyay dugsi sare)*

*Dadka saboolka ah iyo dadka laga tirada badan yahay waxay ahayd inay taageero ka helaan xukuumadda, tusaale ahaan in loo qaybiyo cunto iyo baahiyaha aasaasiga ah, dhiirigelinta ganacsiyada yaryar iyo helista daawooyinka. Intaas midna ma dhicin, in kasta oo Madaxweyne Ku-xigeenka iyo Guddida Qaran ee KOOFIDH-19 ay ballanqaadeen taageero. Sidoo kale, dadka dakhliga hooseeyaa wax taagero ah kama ay helin dowladda. (KQ28 - Qof ka shaqeeya Waxbarashada Aasaasiga ah ee Beddelka ah/Waxbarashada Dadban (ABE/NFE))*

*Si kasta ha noqotee, maan arag marna wax taageero ah oo la siiyay dadka ku nool miyiga iyo tuulooyinka. Balse magaalooyinka waxaa jiray falcelinno tiro badan sida aannu ka aragnay warbaahinta. (KQ39 - Xoolo-dhaqto reer guuraa ah oo aan weligii helin waxbarasho rasmi ah)*

Si lamid ah Muqdisho, waxaa la sheegay in saamayn tabani ay soo gaadhay maciishadda kooxaha danyarta ah ee Hargeysa. Waxaa hoos u dhacay dakhligoodii, waxayna haystaan fursado ka sii yar intii hore.

*Waa dadka ugu nuglaanshaha badan si dhab ahna ayaana waxyeello u soo gaadhay, gaar ahaan dhanka maciishadda.*

*(KQ34 - Qof deggan magaalada oo helay waxoogaa/dhammeeyay ABE/NFE)*

*Kooxahaas si adag ayaa saamayntu ugu dhacday; waxbarashada oo keli ah ma aha ee waxa uu taabtay maciishaddooda, dakhligooda iyo raadsashada fursadaha sababta oo ah waa dad sabool ah. Xaaladdii ugu xumayd ayay waajaheen inta lagu gudo jiray KOOFIDH-19. (KQ35 - Qof deggan magaalada oo helay/dhammeeyay TVET)*

*KOOFIDH-19 ma uu saamayn waxbarashada oo keli ah, waxa uu saameeyay maciishadda qoysaska oo dhan. Maadaama oo aanu nahay dal yar oo soo koraya waxaannu waajahnay xaalad xayiraad oo aad u adag. (KQ25 - Masuul waxbarasho dowladeed oo masuul ka ah Tacliinta Sare)*

## JAWAABCELINTA NATIIJOOYINKA HORDHACA AH

Waxa aannu lahadalay kaqaybgalayaasha, waxaanuna usoo bandhignay natiijooyinkaygii hordhaca ahaa, anaga oo weeydiinayna inay nagu raacsan yihiin iyo inay nagu diidan yihiin.

**Shaxda 9aad: Jawaab celinta natiijooyinka hordhaca ah – Muqdisho**

Kuwani waxaa natiijooyinkayagii hordhaca ahaa ee xirmooyinkii noogu horeeyay ee waraysiyada ahaa ee aannu idinla yeelanay adiga iyo kaqaybgalayaasha kale. Fadlan aanu ogaanno inaad nagu raacsan tahay/ nagu diidan tahay.

| | Aad ugu raacsanahay | Ku raacsanahay | Mana raacsani/ mana diidani | Ku diidanahay | Aad ugu diidanahay | Ma garanayo/ Jawaab la'aan |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Jiritaanka waxbarashada ee Somalia/Somaliland waa mid iska fiican, laakiin maalgelinta ayaa arintan ku noqon karta caqabadda ugu weeyn. | 9 | 6 | 2 | 2 | 1 | 0 |
| Waxaad doonaysaa in diiradda lasaaro, dhaqaalana loo helo tabobarada xirfadaha/farsamooyinka iyo waxbarashada dadban. | 16 | 4 | 0 | 0 | 0 | 0 |
| Deegaannada miyiga ahi fursado yar ayay uhaystaan helitaanka waxbarashada, tayadu waa mid hoosaysa marka laheli karo. Taageero dheeri ah oo helitaanka waxbarashada ah sida deeqo waxbarasho ayaa loo baahan yahay. | 15 | 5 | 0 | 0 | 0 | 0 |
| Manhajka waxbarashada waddanku aad ayuu uga fiican yahay sidii hore, welina waa mid sii kobcaya. | 8 | 6 | 2 | 2 | 1 | 1 |
| Waaxda waxbarashada waxaa kamaqan sharci-dejin iyo jaangooyn; waxaad ubaahan tahay islaxisaabtan dheeri ah. | 10 | 9 | 1 | 0 | 0 | 0 |
| Dadku aad ayay ugu qanacsan yihiin heerka tayada tacliinta sare ee Somalia/Somaliland. | 6 | 4 | 2 | 6 | 2 | 0 |
| Hannaanka waxbarashada waxaa kamaqan usinnaansho. Fursaduhu waxa ay ku xiran yihiin da', deegaan iyo dakhli. | 13 | 7 | 0 | 0 | 0 | 0 |
| Hababka masaafada fog ee barashada ayaa loo dabaqi jiray si isdaba joog ah, laakiin barista khadka tooska ah (online) ma ahan qaab kale oo wax ku ool ah oo beddel u noqon karaysa waxdhigista qofka ee caadiga ah. | 6 | 11 | 0 | 0 | 3 | 0 |
| In ardayga lagu qiimeeyo waxbarashadiisii hore, halkii uu imtixaan ka gelilahaa waxa ay dhaawacaysaa horumarka ardayga ee mustaqbalka. | 7 | 5 | 5 | 3 | 0 | 0 |
| Xiritaanka dugsiyadu waxa uu dhiirigeliyay barashada xirfado cusub oo dhijitaal (digital) ah. | 6 | 6 | 5 | 1 | 1 | 1 |

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Falcelinta ah in laxiro dugsiyada iyo jaamacadaha waxay gacan kageeysatay sidii loo hubin lahaa in dadku ka badbaadaan KOOFIDH-19. | 8 | 7 | 0 | 2 | 3 | 0 |
| Caruurta iyo gaar ahaan hablaha yaryar ayaa ah kuwo aad u nugul marka ay joogaan guriga kadib kafalcelintii KOOFIDH-19. | 4 | 7 | 6 | 1 | 2 | 0 |
| Xiritaanka dugsiyadu waxaa uu saamayn taban ku yeeshay habnololeedkii iyo dakhligii dadka jilicsan. Dadkaas toos looguma bartilmaameedsan kafalcelintii KOOFIDH-19. | 16 | 3 | 1 | 0 | 0 | 0 |

**Shaxda 10aad: Jawaab celinta natiijooyinka hordhaca ah – Hargeysa**

| | Kuwani waxaa natiijooyinkayagii hordhaca ahaa ee xirmooyinkii noogu horeeyay ee waraysiyada ahaa ee aannu idinla yeelanay adiga iyo kaqaybgalayaasha kale. Fadlan aanu ogaanno inaad nagu raacsan tahay/ nagu diidan tahay. | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | Aad ugu raacsanahay | Ku raacsanahay | Mana raacsani/mana diidani | Ku diidanahay | Aad ugu diidanahay | Ma garanayo/ Jawaab la'aan |
| Jiritaanka waxbarashada ee Somalia/Somaliland waa mid iska fiican, laakiin maalgelinta ayaa arintan ku noqon karta caqabadda ugu weeyn. | 4 | 14 | 0 | 2 | 0 | 0 |
| Waxaad doonaysaa in diiradda lasaaro, dhaqaalana loo helo tabobarada xirfadaha/farsamooyinka iyo waxbarashada dadban. | 8 | 11 | 1 | 0 | 0 | 0 |
| Deegaannada miyiga ahi fursado yar ayay uhaystaan helitaanka waxbarashada, tayadu waa mid hoosaysa marka laheli karo. Taageero dheeri ah oo helitaanka waxbarashada ah sida deeqo waxbarasho ayaa loo baahan yahay.. | 7 | 13 | 0 | 0 | 0 | 0 |
| Manhajka waxbarashada waddanku aad ayuu uga fiican yahay sidii hore, welina waa mid sii kobcaya. | 1 | 18 | 0 | 1 | 0 | 0 |
| Waaxda waxbarashada Waxaa kamaqan sharci-dejin iyo jaangooyn; waxaad u baahan tahay islaxisaabtan dheeri ah | 5 | 13 | 0 | 2 | 0 | 0 |
| Dadku aad ayay ugu qanacsan yihiin heerka tayada tacliinta sare ee Somalia/Somaliland. | 0 | 11 | 1 | 8 | 0 | 0 |
| Hannaanka waxbarashada waxaa ka maqan usinnaansho. Fursaduhu waxa ay ku xiran yihiin da', deegaan iyo dakhli. | 2 | 11 | 0 | 7 | 0 | 0 |
| Hababka masaafada fog ee barashada ayaa loo dabaqi jiray si isdaba joog ah, laakiin barista khadka tooska ah (online) ma ahan qaab kale oo wax ku ool ah oo beddel u noqon karaysa waxdhigista qofka ee caadiga ah. | 1 | 16 | 0 | 2 | 0 | 1 |

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| In ardayga lagu qiimeeyo waxbarashadiisii hore, halkii uu imtixaan ka gelilahaa waxa ay dhaawacaysaa horumarka ardayga ee mustaqbalka. | 3 | 9 | 0 | 8 | 0 | 0 |
| Xiritaanka dugsiyadu waxa uu dhiirigeliyay barashada xirfado cusub oo dhijital (digital) ah. | 4 | 13 | 0 | 3 | 0 | 0 |
| Falcelinta ah in laxiro dugsiyada iyo jaamacadaha waxay gacan kageeysatay sidii loo hubin lahaa in dadku ka badbaadaan KOOFIDH-19 | 7 | 13 | 0 | 0 | 0 | 0 |
| Caruurta iyo gaar ahaan hablaha yaryar ayaa ah kuwo aad u nugul marka ay joogaan guriga kadib kafalcelintii KOOFIDH-19. | 1 | 9 | 0 | 8 | 0 | 2 |
| Xiritaanka dugsiyadu waxaa uu saamayn taban ku yeeshay habnololeedkii iyo dakhligii dadka jilicsan. Dadkaas toos looguma bartilmaameedsan kafalcelintii KOOFIDH-19. | 3 | 14 | 0 | 3 | 0 | 0 |

Hal aragti oo ay kamidaysnaayeen kaqeybgalayaasha Muqdisho iyo Hargeysa, oo 100% kaqeybgaleyaashu ka jawaabeen midkood 'Aad baan ugu raacsanahay' ama 'Waan ku raacsanahay', wuxuu quseeyaa in meelaha miyiga ahi u baahan yihiin kaalmo si loo kordhiyo helitaanka waxbarasho tayo leh. Doonista in si gaar ah diiradda loo saaro, khayraad dheeri ahna loo qoondeeyo waxbarashada farsamada iyo ta dadban ayaa sidoo kale si iskumid ah la isugu raacay iyada oo hal-kaqaybgale oo reer Hargeisa ahi ku jawaabay 'Mana raacsani/mana diidani'. Aragtiyada kale ee laga midaysnaa waxaa kamid ah in hababka waxbarashadu aanay lahayn nidaam sharciyeed iyo in xidhitaanka dugsiyadu si xun usaameeyay hab nololeedkii kooxaha saboolka ah.

Saraakiisha waxbarashada dowladda ee ku sugan magaalada Muqdishu ayaa iyagu diiday hadalkii ahaa in tayada tacliinta sare ay tahay mid lagu qanco, iyaga oo sheegaya in tayada ay run ahaantii tahay mid hoosaysa. Tababbarka xirafadeed/farsamo ayaa latilmaamay inay muhiim u tahay kobcinta xirfado dheeraad ah oo lagu taageerayo hab-nololeedka dadka, iyo in xirfadaha dhijitaalka ah ay noqdeen kuwa jira laakiin daruuri ma aha inay ardaydu bartaan.

> *Tayada tacliinta sare way hoosaysaa. Wacyiga xirfadaha dhigitaalka ayaa kordhay, laakiin ardaydu ma aysan helin xirfado. (KQ1 – Sarkaal waxbarasho dowladeed oo masuul ka ah Dugsiyada Aasaasiga ah)*

> *Anigu fikradahaas ayaan qabaa sababta oo ah waa in si gaar ah diiradda loo saaraa tabobarada dhinaca xirfadaha/farsamada. Taas waxaa soo raaca in tayada tacliinta sare aanay gaarsiisnayn heer lagu qanco. (KQ2 – Sarkaal waxbarasho dowladeed oo masuul ka ah Dugsiyada Sare)*

> *Waxaan u baahanahay in khayraad badan loo qoondeeyo tababarka xirfadda. Taasi waxa ay inoo suurtogelinaysaa in dadkeenu ay helaan xirfado kor uqaadi kara heerarka noloshooda. Tayada Tacliinta Sare ee Soomaaliya hawl balaaran ayay u baahan tahay in laga qabto, waana mid kafog in lagu qanco. (KQ3 - Mas'uul waxbarasho dowladeed oo mas'uulka ka ah Waxbarashada Aasaaska ah / Waxbarashada Dadban (ABE / NFE))*

Kaqaybgale kusugan Hargeysa oo kashaqeeya dugsiyada sare ayaa sheegay in tayada waxbarashadu tahay mid hoosaysa sababta oo ah ardaydu maxasuusan karaan wixii ay hore usoo dhigteen.

> *Inta badan ardayda kaqalinjebisay jaamacadaha waddanku maxasuusan karaan wixii lasoo baray sannadkii hore maadaama tayada waxbarashadu tahay mid tayadeedu hoosayso. (KQ27 – macalin dugsi sare)*

Kaqaybgalayaasha Hargeysa waxa ay isku raacsanaayeen in waxbarashadu tahay mid jirta, laakiin in xaqiiqo ahaan la helo dugsiyadaasi waxaa caqabad ku ah dhibaatooyinka dhaqaale, deegaannada iyo gaadiidka/safarka.

> *Waxaa jira arday marwalba ka werwersan kharashka baabuurka si ay uga qaybgalaan fasalada gaar ahaan aradayda ku nool dhulka miyiga ah. (KQ27 – Macalin dugsi sare)*

Hal-kaqaybgale oo reer Mogadisho ah ayaa sidoo kale in doonis la'aan (niyad la'aan) ah in dugsi la'aadaa ay iyana tahay cunsur kale oo dadka udiidaya inay waxbartaan, waxbarashada onlinekuna ma ahayn mid faa'iido sidaa u leh.

> *Haynta lacageed keliya ma aha ta caqabad ku ah helitaanka waxbarashada ee Soomaaliya, niyadda/doonista waxbarashada tegitaankeeda loo hayo ayaa iyana arrin kale ah. Waxbarashada internetka/ online-ka iyana waxbadan ma caawin. (KQ16 –*

*Waxoogaa/dhammaystay Waxbarasho sare - degen magaalo)*

Kaqaybgalayaasha Hargeysa waxa ay iskuraacsanaayeen in Manaahijta waxbarashada waddanku sidii hore ka fiican tahay isla markaana ay marba marka kadambeeya sii horumarayso.

*Manhajku malahayn buug gacmeed hadda ka hor, iminka si fiican ayaa la isugu dubbariday, sidoo kalana luuqadda ayaa lahorumariyay. (KQ27 – Macalin dugsi sare)*

Haseyeeshee, 30% kaqaybgalayaasha Mugadishu waxay xoog u diideen, udiideen, una ogolaan/una diidin in Manhajku soo hagaagayo.

*Manhajka waxbarasho ee wadanku ma aha mid horumaraya, mana ah mid kacaawinaya carruurtu inay helaaan xirfaddaha loobaahan yahay. (KQ18 - Waxoogaa/dhammaytay dugsi dhexe - deggen miyi)*

100% kaqaybgalayaasha Mogadishu waxay isku raacsanaayeen inaan nidaamka waxbarashada loo sinayn.

*Waxbarashada waa laga heli karaa magaalooyinka waaweeyn. Laakiin kuwa naga midka ah ee kunool miyigu magaari karaan waxbarashada. [KQ17 – Aan lahayn waxbarasho rasmi ah, weligii deggan miyi]*

35% kaqaybgalayaasha Hargeysa waxay diideen oraahdaas, iyada oo mid kamid ah saraakiisha dawladda ee waxbarashada ayaa ku dooday in carruurta oo waxbarasho lasiiyaa ay tahay qayb kamid ah dastuurka.

*Waa waajib dastuuri ah in dhammaan carruurta reer Soomaaliland bilaa lacag wax lagu baro laakiin waxaa jira caqabado laxiriira awooditaanka. (KQ25 – Sarkaal dowladeed oo masuul ka ah Waxbarasho Sare)*

60% kaqayb-galayaasha Mogadisho iyo Hargeysa waxay xoog isugu raaceen ama iskuraaceen in ardayda qiimayn loo sameeyo halkii ay imtixaan kageli lahaayeen ay ahayd mid horumarkooda mustaqbalka dhaawacaysa. Haseyeeshee, 40% arintaas way kasoo horjeesteen halka 25% kaqayb-galayaasha Mogadisho aanay diidin, ogolaanna.

100% kaqayb-galayaasha Hargeysa waxay isku raaceen in xidhitaanka dugsiyadu gaacan kageeystay in dadka laga badbaadiyo KOOFIDH-19 however, 25% kaqayb-galayaasha Mogadisho aragtidaas; iyaga oo kudooday in ardaydu ay weli iyaga oo farabadan kooxkoox isugu yimaadaan, ayna ku qaadaan KOOFIDH-19 guryaha iyo dibadaba.

*Ardaydu markii dugsiyadu xirnaayeen waxay joogeen suuqyada, maqaaxiyaha iyo goobaha dadweeynuhu ku kulmo. Xiritaanka dugsiyadu ardayda kama uusan dhigin kuwo guryaha jooga ama ka badbaada cudurkan. (KQ4 - Sarkaal waxbarasho dowladeed oo masuul ka ah TVET)*

Arinta kaqaybgalayaasha, labada gooboodba, badankoodu sida weeyn isugu raaceen waxay ahayd, mid la xiriira amniga carruurta iyo gabdhaha da'da yar ee hadda guryaha jooga maadaama aysan awoodin inay dhigtaan dugsiga. Arintan ka hadalkeeda waxaa kawarwareegay oo diiday inay kajawaabaan labo kaqaybgale oo reer Hargeysa ah, halka lix kaqeybgale oo ka socda Muqdishu midkoodna ma maraacin mana diidin. 40% kaqeybgaleyaasha Hargeysa ayaa kasoo diiday in carruurta iyo gabdhaha da'da yari ay hadda halis badan ku jiraan..

*Gabdhaha da'da yari inay shaqada guriga qabtaan waa waajib marka la eego dhaqankayag, laakiin xaqiiqo ahaan maraacsan inay hawshan u qabtaan si xad dhaaf ah, taas oo keenta inay waqti u waayaan casharada guriga lagagasoo shaqaynayo iyo inay saamayn taban kuyeelato derajooyinkooda. Waxa sidoo kale muhiim ah in laxasuusnaado in gabdhaha yaryari ay xisaabta kaga wanaagsan yihiin wiilasha maadaama sidoo kale ay ku mashquulsan yihiin xisaabtinta qiimaha cunta marka hooyooyinkood u diraan inay soo iibiyaan cunto iyo rooti. (KQ27 – Macalin dugsi sare)*

Kalabadh kaqaybgalayaasha Hargeysa ayay weli qirsansan nuglaanshaha caruurta iyo hablaha yar ee guryaha jooga.

55% kamid ah kaqaybgalayaasha Mogadisho ayaa arintaas isku raacay ama xoog isugu raacay.

*Carruurtu, marka ay guryaha joogaan, way iswaxyeelayn karaan, fadqalalo ayay abuuraan, mararka qaarna ma heli karaan feejignaanta loo baahan yahay ee waalidnimada iyo waxbarashada. (KQ8 – Qof ka shaqeeya Waxbarashada Aasaasiga ah ee Beddelka ah/Waxbarashada Dadban (ABE/NFE))*

## FALANQAYN

### Helitaanka iyo tayada waxbarashada

Qiimeyn togan ayaa ka-qaybgalayaasha Muqdisho iyo Hargeysa ka bixiyeen helitaanka waxbarashada bilowgii. Haseyeeshee, falanqayn dheeraad ah ayaa muujisay caqabado dhab oo ku gedaaman helitaanka waxbarashada. Caqabadahaas waxaa kamid ah kuwo maaliyadeed iyo kuwo la xidhiidha goobta; gaar ahaan, helitaanku waxa uu ku yar yahay dadka ku nool deegaannada miyiga ah. Si fahan dheeraad ah looga qaato dareenka ka-qaybgalayaasha ee ku aaddan helitaanka waxbarashada, waxaa loo bandigay natiijooyin hordhac ah oo cayiman. Markii la weydiiyay in ay waafaqsan yihiin odhaahda. 'Helitaanka waxbarashada Soomaaliya/Somaliland waa ay iska fiican tahay balse lacagta ayaa caqabad weyn ku noqon karta,' inta ugu badan kaqaybgalayaasha Muqdisho way ku raaceen odhaahdaas. Mushkiladda ugu weeyn ee ka-qaybgalayaashu ku arkeen helitaanka waxabarashadu waa kharashka la socda; waxaa laga fahmayaa in

dugsiyadu jiraan balse in yar oo kamid ah bulshadu ay awooddo inay wax ka dhigtaan. Kaqaybgalayaasha Muqdisho ee diiday odhaahdaas waxay awoodda saareen qeybta hore ee natiijada, iyaga oo sheegay in helitaanka waxbarashadu uu dhab ahaan hooseeyo, taas oo waafaqsan jawaabahooda Wareegga 2aad ee waraysiyada. Kaqaybgalayaashaasi si aan isbeddel lahayn ayay u diideen in waxbarashada si baahsan loo heli karo, sida Tacliinta Sare ee Muqdisho.

Kaqaybgalayaasha Hargeysa sida oo kale waxaa jiray tiro yar oo diidday in lagu qanci karo helitaanka waxbarashada. Jawaabaha togan haseyeeshee waxaa lagu saleeyay xaaladda dal soo koraya; iyada oo kaqaybgalayaashu, oo ay ku jiraan masuuliyiin waxbarasho dowladeed, ay sheegeen in ay jirto waxbarasho bilaash ah, balse hirgelinta barnaamijyadu ay ka adagtadahay intaas sababta oo ah deegaanka lagu shaqaynayo. In kasta oo ay sheegeen in waxbarashada la heli karo, haddana qaar kamid ah kaqaybgalayaashu waayo-aragnimo shakhsi ah uma laha waxbarashada; si gaar ah sababta oo ah saddex nooc oo kamid ah muunadda kaqaybgalayaasha waxaa lagu qeexay inayna lahayn waxbarasho rasmi ah. Kala duwanaanshaha xaqiiqada in dadka Soomaaliya iyo Somaliland ay galaangal iska kooban u leeyihiin waxabrashada iyo jawaabaha kaqaybgalayaasha ee tibaaxaya in la heli karo waxaa sababi kara inay tahay dareen, inay tahay war maqal ku soo gaadhay oo uu ku lammaan yahay ku faanista waddanka.

Si lamid ah helitaanka waxbarashada, ayaa dareenka kaqaybgalayaasha Muqdisho iyo Hargeysa ee ku aaddan tayada waxbarashadu u ahaa mid togan oo aan la filanayn. Haseyeeshee, saami la dareemi karo oo kamid ah kaqaybgalayaasha Muqdisho ayaa ku jawaabay in tayada waxbarashadu ay liidato. Hargeysa dhankeeda saddex ka-qaybgale oo keli ah ayaa ogolaaday in tayada waxbarashadu liidato. Si taas loo sii fahmo, kaqaybgalayaasha waxaa loo bandhigay natiijadan, 'Dadku waa ay ku qanacsan yihiin tayada waxbarashada heerka tacliinta sare ee Soomaaliya/Somaliland'. In waxyar kahoosaysa kalabadah kaqaybgalayaasha Hargeysa iyo Muqdisho ayaa diiday howraartaas, iyada oo kaqaybgalayaashu ay sheegayaan in waaxdu ayna lahayn isla-xisaabtan iyo in ardayda qalinjabisaa ayna lahayn xirfado nololeed oo ay ku helaan shaqooyin marka ay waxbarashada dhammeeyaan. Mar kale waxaa muuqata kala tagsanaan yar oo ka muuqata isbarbadhigga jawaabaha Wareegga 2aad, oo ka qaybgalayaashu sheegeen in waxbarashada Soomaaliya/Somaliland ay da' yarta u saamaxdo inay helaan shaqooyin. Isu-dheelitir la'aan ayaa ka jira waayo-aragnimada dadka , oo ah inaan guud ahaan waxbarasho jirin ama tayadeedu ay liidato, iyo dareenka ay ka qabaan waaxda waxbarashadu faa'iido u leedahay dadka dhammeeya waxbarashadooda.

Qodobbada la xidhiidha helitaanka waxbarashada ee kaqaybgalayaasha labada goobood isku waafaqsan yihiin waxaa kamid ah in loo baahan yahay dadyowga ku nool deeggaanada miyiga ah in laga taageero helitaanka waxbarashada, doonis ah in la xoojiyo waxbarashada farsamada iyo xirfadaha, iyo aragtida ah in waaxda waxbarashada ay ka dhiman tahay nidaamintu.

Arrinta la isku waafaqsan yahay ee ah in helitaanka waxbarashada loo kordhiyo dadyowga reer miyiga ah ee ku nool dhulka baadiyaha ah, iyada oo la yagleelayo dugsiyo dheeraad ah iyo taageero maaliyadeed, waxay muujinaysaa in qeybahaas durugsan ee bulshadu ay tahay cidda loogu dayac badan yahay markay timaaddo waxbarashada. Kaqaygbalayaashu 100% waxay sheegeen in bulshooyinkaasi cid kasta oo kale oo joogta Soomaaliya/Somaliland ay uga baahi badan tahay kaalmo, taas oo daaha ka faydaysa dareenka in dadka magaaladu ay ka fursad fiican yihiin dhanka helitaanka waxbarashada; taas oo mar kale fasiraysa ilaa xad jawaabihii tognaa ee wareeggii labaad ee ku saabsanaa tayada iyo helitaanka waxbarashada.

Baahida loo qabo in waaxda waxbarashada farsamada iyo xirfaduhu ay hesho maalgelin dheeraad ah iyo awood saaris ayaa aad u weyn. Kaqaybgalayaashu waxay xuseen in la dayacay TVET intii lagu gudojiray jawaabcelinta KOOFIDH-19, iyada oo aan tixgelin la siinin adeegsiga xirfadaha muddada dhibaatadan. Taas waxaa si xoojisay inayna guud ahaan Soomaaliya iyo Somaliland ka jirin fursadaha barashada xirfadaha la taaban karo, in kasta oo doonistii ay jirto. Iyada oo awoodda ugu badan la saaro waxbarashda rasmiga ah, waxaa la dayacaa waxbarashada aan rasmiga ahayn/dadban, kaqaybgalayaashuna waxay doonayaan in wax laga qabto waxbarashada aan rasmiga ahayn si fursado shaqo oo dheeraad ah loogu abuuro dadka Soomaaliya iyo Somaliland.

Ugu danbayntii, nidaaminta iyo isla-xisaabtanka gudaha ee waaxaha waxbarashada rasmi ah iyo ta aan rasmiga ahayan ayaa imminka la sheegay inayna jirin. Qof ka shaqeeya waxbarashada oo ku sugan Muqdisho ayaa sheegay inay u ololaynayeen in barayaasha shardi looga dhigo inay haystaan rukhad si ay wax u dhigi karaan, in barbilow tayeed looga dhigo dadka ka dhiga waxbarashada taas oo sii wanaajinaysa waxbarashada lagu bixiyo dugsiyada. Dad badan ayaa hela waxbarasho heerkeedu hoosayso oo ay haddana badanaa lacag ka bixiyaan sababta oo ah dugsiyada lala ma socdo, mana laha halbeegyo ay tahay in ay buuxiyaan. Taasi waxay sii wadaysaa meertada ah dad aan aqoon lahayn ee isku dayaya inay shaqo bilaabaan iyaga oo lacag badan soo bixiyay, iyaga oo khalad fahansan in waxbarashadii ay heleen ay anfacayso.

### Waayo-aragnimada Shakhsiga ah ee Waxbarashada

Kala duwanaansho muuqda ayaa ka jira waayo-aragnimooyinka waxbarasho ee shakhsiga ah ee kaqaybgalayaasha marka la eego xaggay ka soo jeedaan iyo waayo-aragnimooyinka shaqo ee imminka. Hargeysa iyo Muqdisho labadaba, kaqaybgalayaasha ka shaqeeya waxbarashada gaar ahaan tacliinta sare, iyo masuuliyiinta dowladda ee masuulka ka ah dhinacyo kamid ah waxbarashada, waxay u badnaayeen inay ka warramaan waayo-aragnimo waxbarasho oo togan Soomaaliya iyo Somaliland dhexdooda. Kaqaybgalayaashani waxay tilmaameen heerar shahaadooyin oo kala duwan oo ay haystaan oo ay kamid yihiin shahaadada jaamacadda ee heerka koowaad, Mastar iyo Phd. Waa ay adagtahay in la qiimeeyo tayada waxbarashada ee shahaadooyinkaas, balse marka la barbardhigo

kaqaybgalayaasha wax ku soo bartay dibadda, waxay u badan tahay inay yihiin kuwo tayo hooseeya marka la eego nidaamin la'aanta waaxda.

Inta badan kaqaybgalayaashu waayo-aragnimo taban ayay ka haystaan waxbarashada sida in ay awoodi waayeen inay aadaan dugsi ama inay dhameeyaan waxbarashada. Sababaha loo dhammeyn waayay dugsiga waxaa kamid ah maaliyad, barakac iyo colaado. Haseyeeshee, kaqaybgalayaasha awoodi waayay inay dhammeeyaan dugsigu waxay ku faraxsanaayeen intii ay gaadheen, iyaga oo muujinaya dareen ku faanis ah; in kasta oo ay rabaan inay dhammaystaan waxbarashadooda haddii ay suurtogal tahay. Qof deggan Hargeysa ayaa sheegay inay carruurtu yihiin kuwa hadda hela mudnaanta helitaanka waxbarashada, taas oo qeyb ka qaadan karta dareenka in waxbarashada aad loo heli haddeer. Waalidiintii aan iyagu fursad badan u heli karin inay wax bartaan ayaa iminka arkaya carruurtooda oo aadaya dugsiyada, sidaas darteedna inay kordheen fursadihii helitaanka waxbarashada.

## KOOFIDH-19

Kaqaybgalayaasha Muqdisho iyo Hargeysa waxay sheegeen in saamaynta KOOFIDH-19 uu ku yeeshay waaxda waxbarashada iyo ardaydu tahay mid waxyeello weyn abuurtay, iyada oo 100% kaqaybgalayaashu ay ogolaadeen in waxyeello uu sababay. Xidhitaanka dugsiyada ayaa la sheegay in uu waxyeelleeyay horumarka waxbarashada carruurta, iyaga oo aan tegin wax fasallo ah ama casharro ku qaadanaya online marka ay suurtogal tahay. Sidoo kale xidhitaanka dugsiyadu waxa uu dhaawacay maciishada dad badan oo isugu jira kooxaha danyarta ah oo nadiifiyayaal iyo howlwadeennada dugsiyada kamid ah ilaa barayaasha iyo hay'adaha waxbarasho laftarkooda maaliyad la'aan awgeed.

Kaqaybgalayaashu waxay aqoonsadeen in maamullada Soomaaliya iyo Somaliland ayna diyaar u ahayn xaalad degdeg ah oo noocan oo kale ah iyo in jawaabaha dowladdu ay waxyeelleeyeen maciishadda dadka. Qaar kamid ah kaqaybgalayaasha ayaa sidoo kale dareemay in jawaabta ah xidhitaanka dugsiyadu wax ka tarin joojinta faafitaanka cudurka KOOFIDH-19 maadaama dadku ay weli tagayeen masaajiddada, ayna isugu imanayeen suuqyada. Waxaa la sheegay in da' yartu gaar ahaan ay suuqa isugu imanayeen kooxo badan si ay u bulsheeyaan, sidaas darteedna, xidhitaanka dugsiyadu aanu waxtar lahayn. Qaar kamid ah kaqaybgalayaasha ayaa hubay in KOOFIDH-19 uu maamulka ka dhigi doono mid u diyaar ah xaalado lamid ah mustaqbalka, in kasta oo ayna jirin caddaymo cayiman oo taas taageerayaa.

Si loo taageero ardayada inta dugsiyadu xidhan yihiin, kaqaybgalayaasha Hargeysa iyo Muqdisho waxay sheegeen in la bilaabay waxbarasho online ah. Waxaa la sheegay in ardayda jaamacaduhu heleen waxbarasho ka tayo fiican oo kana joogtaysan ta ay heleen dugsiyada hoose iyo sare iyada oo la adeegsanayo barnaamijyo ay kamid yihiin Zoom iyo adeegyada Google. Sababo la xidhiidha adeega internetka ee Soomaaliya iyo Somaliland, adeegsiga barnaamijyadaasi mar kasta suurtogal ma aha. Taas waxaa barbar socota in kharashka adeegsiga internetku uu qaali ku yahay dad badan, sidaas darteed na ay sii adkaanayso helitaanka waxbarashadu. Agabyada loo adeegsado waxbarashada online-ka ah ayaan iyana la wada heli karin sababta oo ah sicirkooda qaaliga ah, waxaana arrintani ugu saamayn badan tahay kooxaha danyarta ah. Hababkan waxdhigashada ee online ka ah ee la adeegsaday xilliga safmareenkani waa mid xulasho ah oo meesha ka saaraysa dad tiro badan.

Adeegyada TV-ga iyo raadiyaha ayaa sidoo kale loo isticmaalaa in lagu sii wado waxbarashada ardayda, iyada heerarka guushuna kala duwan yahay. Casharadii ayaa la duubay ka dibna laga sii daayay barnaamijyada telefishanka iyo raadiyaha. Tani waa dhibaato sababta oo ah heerarka waxbarasho ee kala duwan ee dadka iyo waqtiga xaddidan ee lagu soo bandhigayo casharrada si kastaba ha ahaatee, habka firfircoon ee baahinta aaladaha waxbarashadu waxay muujineysaa qorshe ay tixgelin siinayaan mas'uuliyiinta waxbarashadu. Mar labaad, kooxaha danyarta ah guud ahaan looguma talogelin inay helayaan, in kastoo magaalada Hargeysa, kaqeybgalayaashu sheegeen in dawladdu ay siisay idaacado la qaadan karo oo lacag la'aan ah dadka aan awoodin inay iibsadaan. Idaacadahaas lama siin qof walba oo u baahan, laakiin waa tallaabo aad u wanaagsan oo loo qaaday sidii dowladdu ay ula shaqeyn lahayd kooxaha liita xilliyada ay jiraan xaaladaha degdegga ah ee qaran; sidaas wax lamid ah lagamasoo sheegin Mogadishu. Markii lagu soo bandhigay natiijooyinka horudhaca ah, 'Xiritaanka iskuulada waxay dhiirigelisay barashada xirfadaha cusub, xirfadaha dhijitaalka', waxaa jiray tiro yar oo kaqeybgaleyaal ah oo ka soo horjeestay odhaahdaas. Intooda badan kaqeybgalayaasha reer Hargeysa ayaa isku raacay, iyada oo kaqeyb galayaasha Muqdisho aysan dhinacna aad ugu adkaysan.

Maaddaama ardaydu aysan dhigan karin dugsiga, sidoo kale ma aysan awoodin inay galaan imtixaanadoodii qorshaysnaa si loo qiimooyo/loosaxo. Kaqeybgalayaal kala duwan oo ka kala socday Hargeysa iyo Muqdisho ayaa sheegay inay dareemeen in arintaas wax u dhimayso horumarka ardayda. In ka yar kalabar kaqaybqaatayaasha Hargeysa ayaa ku raacsaneyd helitaanka hordhaca ah, 'Isticmaalka qiimeynta horumarka ardayda ee bedelka ah imtixaannada waxay dhaawacaysaa horumarka ardayda mustaqbalka', iyada oo seddex ka mid ah kaqaybgaleyaasha Muqdisho ay diidan yihiin. Waxaa latilmaamay in ardayda ay habkan kaqaadeen niyadjab, iyaga oo cabsi kaqaba in laga hoosmariyo derajooyinkii ay filanayeeninay kuguulaystaan. Tani waa walaac ay wajaheen dalal badani intii lagu jiray cudurka faafa ee KOOFIDH-19, iyada habkan qiimayntuna yahay mid si weeyn loo aaminsan yahay inuu yahay doorashada ugu habboon duruufaha jira. Soomaaliya iyo Somaliland, qaabkan noocan ahi wuxuu waxyeello u geysan karaa horumarka waxbarasho ee ardayda madaama aanay jirin sharci jira oo lagu kormeerayo hawshani.

### Kooxaha Danyarta ah

Tiro badan oo kaqaybgaleyaasha ka mid ah ayaa ku raacsan natiijooyinka hordhaca ah ee soo socda, 'Xidhitaanka dugsiyada ayaa si xun u saameeyay habnololeedkii iyo dakhliyadii kooxaha danyarta ah. Kooxahan tixgelin toos ah lamasiin inta lagu jiray waxkaqabashada KOOFIDH-19 ', iyada oo seddex ka mid ah kaqaybgalayaasha oo keliya ay ka soo horjeesteen hadalkaas. Waxqabadka dowladda ee Soomaaliya iyo Somaliland ayaan tixgelin gaar ah siinin kooxaha danyarta ah oo ay ku jiraan carruurta, qoysaska saboolka ah iyo gabdhaha da'da yar. Waxqabadyada dawladu waxay arkeen in dhalinyaradu ay guryahooda la joogaan xubno reqooyskooda ah oo laga yaabo in ay shaqooyinkoodii uwaayeen, dugsiyada laxiray awgood, taas oo labadoodaba ku abuuraysa jawi walaac badan oo laga yaabo inuu caruurta geliyaan halista ka dhalata rabshado iyo xadgudubyo.

Gabdhaha yaryar ayaa la sheegay inay si gaar ah ugu nugul yihiin magaalada Muqdisho, iyaga oo halis sii kordhaysa ugu jira guur khasab ah. Arintaas ayay kaqaybgalayaashu ku kala aragti duwanaayeen iyada oo qiyaastii 50% reer Hargeysa iyo Muqdisho labaduba ay diideen hawraartan 'Caruurta, iyo gaar ahaan gabdhaha da'da yar, ayaa aad ugu nugul guryahooda ka dib falcelinta waxbarasho ee' KOOFIDH-19 ', iyagoon waxba isla ogoleeyn, isladiidanayn, diyaarna u ahayn in ka faaloodaan. Waa mawduuc kawadahadalkiisu xaasaasi yahay sida kamuuqata sharaxaadda ay bixiyeen qaar kamid ah kaqaybgalayaashu**.** Si kastaba ha noqotee, hablahan iyagu waxbarta, oo ah boqolley hoose marka la barbar dhigo wiilasha ku nool Soomaaliya iyo Somaliland, ayaa hadda laga saaray dugsiyadoodii waana kuwa ay aadka ugu dhowdahay in lagu halleeyo/dhiibo dhammaan dhammaystirka shaqada guriga iyo shaqooyinka kale. Is-dhexgalka joogtada ah ee maalinlaha ah waxaa ka abuurmi karaa fursado looga faa'ideysto iyo xumaynta oo aan horey u jirin.

Marka laga hadlayo hab-nololeedka, dad badan ayaa sii wadi kari waayay shaqooyinkoodii sababo la xiriira xannibaadaha ay soo rogeen dowladaha Soomaaliya iyo Somaliland. Kuwan waxaa ku jira dadka ka shaqayn jiray dugsiyada. Mana aysan jirin taageero maaliyadeed oo dowladeed sidaa awgeed dad badan oo dakhligoodii ku waayey kafalcelintii KOOFIDH-19 ma helaan ilo kale oo dakhli kasoo galo. Tani keliya ma aha mid sii kordhinaysa halista xanuunka ee kadhalanaysa awoodda la'aanta iibsiga Qalab Ilaalin Shaqsiyeedka (PPE), balse sidoo kale waxay kordhineysaa cadaadiska qoyska dhexdiisa, waxayna uga sii daraysaa ciriiriga dhinacyada maskaxda iyo jidhkaba ah. Inta badan kaqaybgalayaashu waxay isku raaceen in kooxahani ay aad ugu dhow yihiin inay yihiin kuwa ugu daran ee saamaynta taban kala kulmay kafalcelinta dowladda iyo in istaraatiijiyado si gaar ah iyaga diiradda loogu saaraa ay noqon lahaayeen mirodhal.

### NATIIJOOYINKA MUHIIMKA AH

Waxaanu daboolka kaqaadnay fikrado xoog badan oo kusaabsan waxbarashada Soomaaliya iyo Somaliland. Waxbaashadu ma aha mid ay gaadhayaan dadka intooda badani, haseyeeshee, marka la eego jawaabaha kaqaybgalayaasha, caruur badan ayaa iminka awooda inay helaan nooc waxbarasho ah oo toos ah ama dadban marka la barbar dhigo jiilkii hore.

Bulshooyinka miyiga kunooli waxa u baahan yihiin in si gaar ah diiradda loogu hayo, feejignaan iyo khayraad dheeri ah. Badanaaba dadka kunool miyigu mahelaan wax tas-hiilaad waxbarasho ah, haddii ay helaanna tayo waa mid aad u liidata. Intii lagu jiray falcelinta KOOFIDH-19 dadyawga deggan magaalooyinku waxay heleen taageero badan oo dowladeed, halka deegaannada miyiguna ahaayeen kuwo ladayacay.

Dadka reer Hargeysa iyo kuwa Mogadishu ayaa aad u raadinaya TVET iyo dariiqooyinka kale ee bedelka noqon kara waxbarashada tooska ah iyo tan dadban. Falcelinta dowladdu may garawsan baahida dhabta ah ee TVET intii lagu guda jiray falcelinta KOOFIDH-19, taas oo abuuraysa farqi marka hababka waxbarashada mihnadaha/farsamada iyo kuwa dadban labarbardhigo waxbarashada rasmiga ah. TVET waxay u baahan tahay maalgelin dheeri ah iyo feejignaan.

Tayada waxbarashada waxaa si xun u saameeyay Jaangooyn la'aanta iyo maqnaanshaha qawaaniinta lagu maamulo dugsiyadaiyo jaamacadaha ka hawl gala Soomaaliya iyo Somaliland. Tani waxay saamayn xun kuyeelataa dadka waxbarashadooda, xaalada dhaqaale iyo rajada shaqooyinkooda mustaqbalka.

KOOFIDH-19 waxa uu si daran u dhaawacay nidaamkii waxbarasho aqoon ahaan iyo dhaqaale ahaanba. Ardaydu iminka way kadib dhacsan yihiin sanad dugsiyeedkii, buundooyinka ay heleenna waa kuwo qiimayn ah ee kuma iman imtixaanno, taas oo u dhow inay saamayn taban kuyeelato horumarkooda. Dugsiyadu ma helaan lacagtii ardayda laga qaadi jiray ama taageero dhaqaale, waxaana suurtogal ah inay awoodi waayaan inay sii shaqeeyaan.

Kooxo danyarta ah ee ay ka midka yihiin bulshooyinka reer miyiga ah, shaqaalaha dakhligoodu hooseeyo, haweenka iyo gabdhaha waxtixgelin ah lamasiin markii falcelinta laga samaynayay KOOFIDH-19 ay waxbarashadoodii iyo hab nololeedkoodiina waxyeelo balaadhan ayay u dhaawacmeen. Caruurtu waxay halis weeyn ugu jiraan rabshado iyo inay waqti xad dhaaf ah ku qaataan guriga - halkaas oo ay ka jiraan welwelo caafimaad iyo dhaqaale.

KOOFIDH-19 iyo falcelimaha dowliga ah ee Soomaaliya iyo Somaliland waxay dhibaatooyin adag ku abuureen muwaadiniintooda. Caafimaadka dadka ayaa lagu doodi karaa in la ilaaliyay xiritaanka dugsiyada, laakiin habnololeedyadii iyo waxbarashadii ayaa loo waxyeeleeyay siyaabo kale. Rabitaanka kaqeybgalayaasha ee ah inay arkaan waxbarasho dheeri ah ee TVET ayaa ah natiijo wax ku ool ah oo loo baahan yahay in dabogal lagu sameeyo iyada oo la raacayo

fikradda ah in dib wax loogu dhiso si ka wanaagsan wixii jiray 'KOOFIDH-19' hortii.

## Tixraacyada

**Mahadnaqyo**: Taakulada Golaha Dhaqaalaha iyo Cilmi-baadhista Bulshada Ee Boqortooyada Ingiriiska waxaa uu si weyn u bogaadiyey Ciwaanka TESF Ee "Dib-u-qaabeynta Waxbarashada Si Loo Gaadho Mustaqbal Waara"

Waxa kale oo aan u mahadnaqaynaa Cabdikariim Ibraahim Jaamac sida wanaagsan oo ugu turjumay warbixintan Af-Soomaali

**La Xidhiidh Ciwaanka Hoose:**
**Soo Gudbinta Soo Saarayaasha Tixraacyada**:
https://doi.org/10.5281/zenodo.3952649

Daabacaada 1.0 taariikhda Soo Saarista.

Xaquuqda TESF Wax-qabadkan waxaa Lagu soo saarey xeerka BY-NC-SA Ee Shatiga 4.0 Ee Caalamiga ah.

Attribution-NonCommercial-ShareAlike
4.0 International (CC BY-NC-SA 4.0)

This license lets others remix, tweak, and build upon the text in this work for non-commercial purposes. Any new works must also acknowledge the authors and be non-commercial. Derivative works must also be licensed on the same terms.

This license excludes all photographs and images, which are rights reserved to the original artists.

**Image credits**
Example: Cover Image Photo by OC Gonzalez on Unsplash

TESF waa deeq uu maalgeliyo GCRF iyo bahwadaag kale, waa isu-dubarid meel ka baxsan Jaamaacadda Bristol ka socda, ayada oo la shaqeyneysa bahwadaagta reer Hindiya Rwanda, Soomaaliya/Somaliland, Koonfur-afrika, Boqotooyada Ingiriiska, iyo Hooland. Waxaanu sameynaa wada-shaqeyn daraasadeed si dib-u-qaabeyn loogu sameeyo waxbarashada si loo gaadho mustaqbal waara.

TESF ururada ay wada shaqeeyaan:
Indian Institute for Human Settlements
Rhodes University
Transparency Solutions
University of Bristol
University of Nottingham
University of Rwanda
Wageningen University

www.tesf.network
enquiries@tesf.network
@TransformingESF

Eric Herring, Peter Campbell, Mustafe Cilmi, Latif Ismaaciil, Sandra McNeill, Cabdi Rubac, Asma Siciid Cali, Amal Siciid, Maxamed Shidane.